***SOMALI Heart Book***

# QALBIGA DADKA



COPYRIGHT
ISBN 1 - 874934 - 23 - 1

E-MAIL: info@angp.co.za
**ALL NATIONS GOSPEL PUBLISHERS**
P.O. BOX **2191, PRETORIA, 0001, R.S.A.**

(A Gospel Literature Mission financed by donations)
(Reg. No. 1961/001798/08)

Copyright: ANGP

QALBIGA DADKA

# AMA
# OKIYAALAHA RUUXIYANKA AH OO QALBIGA LAGU TIJAABIYO

(Sawiro Maskaxda Looga Shaqaysiyey Ayaa Lagu Macnayay)

Buugan wuxuu ka soo farcamay wadanka Faransiiska sanadkii 1732, waxaa dib u saxiixay oo dib ugu qoray hawlaha gaarsinta Injiilka Afrika la gaarsinaya, wadaad la yidhaahdo J.R. Gschwend sanadka 1929, daabacadaas wixii ka dambayay waxaa jiraan luuqada badan oo loo rusqayay inay daabacaan oo hadda luuqadaha lagu daabacay waxay dhanyihiin 250 waxaana daabacaa All Nations Gospel Publishers – waa haayad Masiixi ah oo xilka iska saartay inay luuqadahaan kala duwan ay qarash geliso oo ay daabacdo. Waxaana aduunka oo dhan ku qaybiyaan ururo kala joogaan 127 wadan. Dad luuqada kala duwan ku hadla, kala daraja weyn, diima kala duwan ku jiraan ayuu buugan taabtay uu tusay baahida ruuxiyanka ah uu qof kasta u qabo farinta Ilaah uu baniaadmiga ugu talagalay sida uu nebi Yexesqeel sheegay 586 oo sanadood Masiixa ka hore markuu yidhi, "26 Oo weliba waxaan idin siin doonaa qalbi cusub, oo ruux cusubna waan idin gelin doonaa; jidhkiinnana qalbigii dhagaxa ahaa baan ka dhex bixin doonaa, oo waxaan idin siin doonaa qalbi jiidh ah. 27 Oo Ruuxayga ayaan idin dhex gelin doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa inaad qay-nuunnadayda ku socotaan, xukummadaydana waad xajin doontaan, waadna samayn doontaan. 28 Oo waxaad degganaan doontaan dalkii aan awowayaashiin siiyey, oo dadkaygii baad ahaan doontaan, aniguna Ilaahiinna baan ahaan doonaa." (Yexesqeel 36:26-28).

Copyright ANGP

## QALBIGA DADKA

## MACBUDKA ILAAH MISE DUKAANKA SHEYDAANKA

(1 Yooxanaa 3:4-10)

Intaad buugan akhrinaysid fadlan ogow wuxuu kuu yahay sida muraayad aad iska dhex arkaysid. Haddii aad Masiixi tahay iyo haddii kaleba, haddii aad tahay mid weli Masiixa rumaysan ama mid rumaysadka Masiixinimo ka soo noqdayba, waxaad iisu arki doonta sida uu Ilaah kuu arkaya. "Markaasaa rabbigu wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Ha fiirin soojeedkiisa, ama dhererkiisa, maxaa yeelay, waan diiday isaga. Rabbigu wax uma · arko sida dadku wax arko, waayo, dadku wuxuu fiiriyaa muuqashada dusha, Rabbiguse qalbiguu fiiriyaa." (1 Samu'eel 16:7). Ilaah wuxuu noo arkaa isla sida aan nahay.

Sheydaanka waa aabbaha beenta oo dhan. Isagu waa amiirka mugdiga waana ilaaha aduunkan, kan iska dhigaya Malaa'igta nuurka si uu nimanka iyo dumarka waddada xaqa ah uga leexiyo. Maalmahan aan ku noolnahay isla sida ay waagi hore ahaan jirtayba waxaa jiraan r asuullo been ah kuwaas oo iska dhigayaan inay yihiin rasuullada Masiixa. Tanna la yaab ma ahan waayo, sheydaankuba wuxuu iisu

ekeysiyey Malaa'igta nuurka (2 Korintos 11: 13, 14). Sheydaarika, kan ah ilaaha aduunkan wuxuu dadka ku haya mugdiga si aanay u arkin jacaylka llaah ama si aanay u . ogaanin inuu Masiixa iyaga u dhintay (2 Korintos 4:4). Dembiilayaasha oo dhan iyo kuwa aanan Masiixa rumaysnayn oo dhan way ka dhinteen xagga ruuxiyanka wayna ka indha la'yihiin waxyaalaha llaah. Waxaa iyaga xukumaya sharka adduunkan {Efesos 2:1-2). llaa ay indhahooda ka furmayaan oo ay dariiqa saxda ah ka soo raacayaan, waxay ku sugan yihiin baaba'a weligiis ah. Qofka leh, "anigu weligey ma aanan dembaabin" waa mid been iisu sheegaya. Maxaa yeelay, "Kii dembi falaa wuxuu yahay kan lbliiska;; oo lbliisku tan iyo bilowgii ayuu dembaa-bayay. Taas aawadeed ayuu Wiika llaah u muuqday inuu baabi-iyo shuqullada lbliiska:· (1 Yooxanaa 3:8). "Haddaba llaah ka dambeeya, laakiin lbliiska hor joogsada, wuu idinka carari doonaaye. U soo dhowaada llaah, isaguna wuu idiin soo dhowaan doonaa. Dembiilayaashow, gacmihiinna nadiifiya. Labaqalbiilayaashow, qalbiyadiinna daahiriya. (Yacquub 4:7,8).

lntii aad buugan akhrinaysid oo aad sawarada fiirinaysid, waxaad arki kartaa qalbigaada. U ogolow llaah inuu qalbigaada baadho si uu kuu ogaysiyo sida uu qalbigaada u yaala. Ogolow inaad dembiila tahay oo ha inkirin dembiyadaada maxaa yeelay, haddii aan erayga llaah ka akhrino 1 Yooxanaa 1 :1-10 wuxuu leeyahay, "1 :1 Waxaannu idiin soo qoraynaa wax ku saabsan wixii tan iyo bilowgii jiray, oo aannu maqalnay, oo aannu indhahayaga ku aragnay, oo aannu eeg'nay, oo ay gacmahayagu taabteen oo Hadalka nolosha ah. 2 Nolosha waa la muujiyey, oo waannu aragnay, waanan u marag furaynaa, oo waxaannu idiinka warramaynaa nolosha weligeed ah, ta Aabbaha la jirtay oo lanoo muujiyey. 3 Wixii aannu aragnay oo aannu maqalnay ayaannu idiinka warramaynaa, si aad idinkuna noo soo wehelisaan; oo wehelnimadeennu waa mid la jirta Aabbaha iyo Wiilkiisa Ciise Masiix ah. 4 Oo waxaannu waxyaalahan idiinku soo qoraynaa si ay farxaddiinnu u buuxsanto.

5 Warkii aannu ka maqalnay oo aan idiinka warramayno wuxuu yahay, in llaah nuur yahay, oo isaga aan gudcur ku jirin innaba. 6 Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno. 7 Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa, oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifiyaa dembi oo dhan. 8 Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma jirto. 9 Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu wa aamin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan. 10 Haddaynu nidhaahno, Ma aynu dembaabin, waxaynu llaah ka dhignaa beenaaleh, oo hadalkiisu inaguma jiro"

Waxaa ku xukumaya sheydaanka .arna llaah; waxaad u addoonsantahay sheydaanka ama waxaad tahay mid llaah u addeega. Hadduu dembiga xukumaya nooloshaada, ha inkirin, laakiin llaah u barooro. Wuxuu kuugu xoraynaya Ciise Masiix kan u yimid adduunkan inuu badbaadiyo dembiilayaasha, si uu u burburiyo awoodda sheydaanka iyo sheydaanka noolosheena xukumaya. lsagu waa badbaadiyaheena. Waxaad hor joogtaa l laah qoduus ah oo aay jirin wax laga qari n karo, fikiradaha qarsoon iyo ficilada nooloshaada oo dhan. Way adagtahay inaad llaah iska qarisid ama aad ficiladaada ka qarisid llaah, maxaa yeelay, "Kii dhegta abuuray, sow wax maqli maayo? Kii isha sameeyeyna. Sow wax arki maayo?" (Sabuurrada 94:9).

"Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay hor iyo dib u fiirinayaan dunida oo dhan inuu isu adkeeyo kuwa qalbigoodu isaga xaggiisa ku qumman yahay. Taas ayaad nacasnimo ku samaysay, oo hadda ka dib dagaallo baad ku jiri doontaa,' (2 Taarikhdii 16:9). "Waayo, indhihiisu waxay fiiriyaan jidadka binu-aadmiga, Wuxuuna wada arkaa socodkiisa .oo dhan. 22 Ma jiro gudcur ama hoosdhimasho toona Oo ay kuwa xumaanta sameeyaa ku dhuuntaan." (Ayuub 34:21 ,22) "Laakiin Ciise qudhiisu iskuma hallayn iyaga, waayo dadka oo dhan ayuu yiqiin, oo uma baahnayn in laga marag furo dadka, waayo, isaga qudhiisu waa yiqiin waxa dada ku jira. (Yooxanaa 2:24) "Waxaa barakadaysan kii xadgudubkiisa la cafiyey, oo dembigiisa la daboolay. Waxaa barakadaysan ninkii aanu Rabbigu dembi ku tirin, Oo ruuxiisa aanay khiyaano ku jirin. (Sabuurrada 32: 1 ,2).

Copyright: ANGP

## 1. QALBIGA DEMBIILAHA AH.



Sawirkan wuxuu na tusinaya sida qalbiga ninka ama naagta reer aduunka ah uu u yaalo, taa oo Baybalka looga macnayay dembiile, macnaha waa qof u damaca sharka ah ee dunida uu hogaamiyo waayo, qofkan wuxuu leeyahay damacyada caadiga ah iyo jacaylka uu u qabo inuu damaciisa dherjiyo. Tan waa sawirka runta ah sida uu llaah u arko. Wejiga kuduudan, indhaha cascaas waxay ka hadlayaan sakhraanimada sida aan uga akhrinayno Maahmaahyadii 23:29-33 oo dhigan,
"Bal yaa hoog leh? Oo yaa caloolxumo leh? Oo yaa murammo leh? Oo yaa calaacal badan leh? Oo yaa u dhaawacan sabab la'aan? Oo yaa indho casaan ah leh? 30 Waa kuwa wakhti dheer ku raaga khamriga, Waana kuwa u .taga inay doondoontaan khamri laysku daray. 31 Ha fiirin khamrigu markuu casaado, Markuu koobka ka dhex dhalaalo, Iyo markuu si wanaagsan u shubmayoba. 32 Ugu dambaysta wuxuu wax u qaniinaa sida abeesada, Oo sida jilbiskana wax buu u qaniinaa. 33 Indhahaagu waxay arki doonaan naago qalaad, Oo qalbigaaguna wuxuu ku hadli doonaa waxyaalo qalloocan."

Madaxa hoostiisa sawirkan waxaan ka arkaynaa in qalbiga dadka ay ka buuxaan xayawaano, kuwaa oo ka hadlayaan dembiyada kala duwan ee qalbiga baniaadmiga ku jiraan, madaama uu qalbiga yahay bartamaha ay ku tarmaan dembiyadeena. I laah wuxuu nooga sheegaya afka nebigiisa Yeremyaah isagoo leh, "Qalbiga dadku wax kasta buu ka khiyaano badan yahay, oo aad iyo aad buu u xun yahay, bal yaa garan kara?" (Yeremyaah 17:9). Ciise naftiisa tan wuu cadayay oo wuxuu yidhi, "Waayo, waxan weeye waxa qalbiga dadka gudihiisa ka soo baxa fikirrada shar leh, iyo wasmada xaaraanta ah, iyo tuuganimada. Iyo dilidda, 22 iyo damacnimada, iyo sharka, iyo khiyaanada, iyo carnal xumaanta. Iyo ii xun, iyo cayda, iyo kibirka, iyo nacasnimada. 23 Wax yaalahan shar leh oo dhammu gudahay ka soo baxaan oo ninka nijaaseeyaan:· (Markos 7:21-23).

1. DAAUUS · In kastoo ay quruxdaa daauuska dadka jacaylyihiin, halkan qalbiga dadka dhexdiisa, waxay ka hadlaysaa dembiga isla weynida ama kibirka. Lusifa kaa oo mar ahaa mid ka mid ah Malaa'igaha llaah laakiin markuu kibray wuu gefay jagadiisii wuxuuna noqday cadawga I laah - sheydaan (Ishacyaah 14:9-17; Yexesqeel 38: 12-17).

Kibirka wuxuu ka soo aasaasmay naarta dhexdeeda, waxaana jiraan habab badan uu isku muujinaya. Dadka qaarkood waxay ku kibraan taajirmimadooda, cilmigooda; dharka heerka sare ah oo ay jidhkooda si qaawanaan ah ku muujinayaan; xirashada bangiliyaasha, far geliska iwm, sida qumaati looga sheegaya Baybalka qaas ahaan Ishacyaah 3:16-24. Qaar kalena waxay ku kibraan awowayaashoodii hore, qabiilkooda, waddankooda, dhaqankooda, ciyaaraha, iwm, iyagoo ilowbaya in lagu yidhi "Sidaasoo kalena dhallinyaraday, odayaasha ka dambeeya, oo kulligiinba is-hoosaysiiya, in midkiinba midka kale u adeego maxaa yeelay, Ilaah waa hor joogsadaa kuwa kibra, laakiinse kuwa is-hoosaysiiya ayuu nimco siiyaa:' (1 Butros 5:5). Ilaah wuu nacaybyahay kibirka iyo isla weynida (Maahmaahyadii 8: 13). "Kibirku wuxuu hor socdaa baabba', Oo madaxweynaanuna waxay hor socotaa dhicid. (Maahmaayadii 16:18).

2. RIDA · Waxay u taagantahay damacyada jidhka shar ku dhaqashada, dhilaysiga. Dembiyada halkan laga sheegay aaday dunida maanta ugu badanyihlln, laakiin maalmaha ugu dambaya, ilaa ay ka gaartay heer aan rumayno erayadii uu Ciise Masiix ku hadlay 2,000 oo sanadood oo la soo dhaafay, markuu yidhi, maalmaha ugu dambaya waxay noqon doonaan sida kuwii Sodom iyo Gomooraah. Ma ahan oo keliya inay dembiyadaan nimanka iyo naagaha maanta ku bateen madaama ay soo galeen guryaha dadka culumada ah iyo kuliyadaha, skoolada iyo hoteelada, laakiin ceebtan iyo sharkaan intiisa badan waxaan arkaynaa inay maanta qalbiga dadka ku gelayaan shilemooyinka, meelaha ciyaaraha lagu tuso, buugagta iyo magaziinada sawirada xun xun leh iyo weliba habab kale oo fara badan, maanta waxa uu Ilaah dembi leeyahay waa waxyaalaha uu aduunka maanta ku magacaabaya hor mar. Malayiin dhalanyar ah ayaa habkay u noolaan lahaayeen shilemooyinka iyo buugagta ka fiirsanaya, isla markaana waxay kala kulmaan dhibatooyin fara badan, ceeb iyo shalayn. Dadka dabeecadaha xun xun oo shileemooyinka hagaajiya waxay noqdeen kuwa ay dhalanyarteena maanta ay ka dhigteen waxa keliya oo ay nolosha kaga deyan karaan. Meelaha ciyaaraha dabalulka ama daansiga lagu ciyaara naftooda waxaa ku jiraan waxyaala fara badan oo qafal xumo ah oo ay dhala.nyarteena ka baranayso. Gesiyiintii Ilaah oo nadiifka ahaan jereen sida Yuusuf (Bilawgii 39) iyo kuwa kale maanta looma arko inay yihiin dad noolosha looga deyan karo. Xataa duqoobihii qabiilka kofurta Afrika oo la odhan jiray Zuulu oo kuwa dhilaysta dili jiray ayaa maanta loo qaatay inay aduunka nolosha hormarka ah ku nool baraan wax ku saabsan ku dhaqashada anshaxa wanaagsan maalinta xukunkana way nala istaagi doonaan xukumaadda. Ilaah wuxuu noo sheegaya inaanan ku ciyaarin anshax xumada laakiin aan ka dheeraano. "Ka carara sinada. Dembi kaloo kasta oo nin falo, jidhka waa ka dibadda, laakiin kii dhillanimada falaa jidhkiisuu ku dembaabaa. 19 Arna miyaanaydin ogayn jidhkiinnu inuu yahay macbudka Ruuxa Qoduuska ah ee idinku jira ee aad Ilaah ka hesheen? Oo idinku isma lihidin." (1 Korintos 6: 18, 19); "Nin uuni hadduu macbudka Ilaah kharribo. Isaga Ilaah baa kharribi doona, waayo, macbudkii Ilaah waa qoduus kaad idinku tihiin." (1 Korintos 3:17).

3. DOOFAARKA · Wuxuu ka hadlaya dembiga sakhraanimada iyo hunguri weynida. Waa xayawaan wasakh ah oo cuna wax alaate wuxuu arko, haddii ay nadiif yihiin iyo haddii ay wasakh yihiinba, isla sidaasna qalbiga sharka jacayl wuxuu ku dhaqmaa fikirad kastoo shar ah, hab kastoo shar ah, sawir kastoo shar ah, akhris kastoo shar ah iwm. Jidhkii loogu talagalay inuu noqdo macbudka Ilaah, ayaa lagu wasakhaynaya cunto daran iyo dabeecado wasakh ah sida dhuuqista sigaarka, tubbaako cunista, chaad cunista cabista biirka, istecmaalka banklqa iyo daroogooyin kale oo jidhka wax u dhimaya. Dabeecadda dhuuqista tubaakada iyo daroogooyinka kale maanta ayuu istecmaalkooda nimanka iyo naagaha qabsaday ka badan sida ay waagi hare ahaan jirtay. Ilaah keliya ayaa qofkan tubaakada dhuuqa oo sheydaanka u addoonsamay xorayn kara. Madaama ay dadka diinta ka soo noqday ay isku deyeynin inay Kiniisadda sigaar ku dhex dhuuqaan, maxaa yeelay, waxay u haystaan inay Ilaah kiraahiyo ku tahay, kama xishoonayaan meelaha kale markay joogaan ay xishood la'aan sharkaas u samayaan oo ay wasakhayaan jidhkooda ah macbudka Ilaah. "Runtii waad ogtihiin" ayuu leeyahay Rasuull Bawlos, "Miyaanaydin garanaynin inaad tihiin macbudkii Ilaah oo uu Ruuxa Ilaah idinku jiro?



Copyright: ANGP

Nin uuni hadduu macbudka llaah kharribo isaga llaah baa kharribi doona, waayo, macbudkii llaah waa qoduus kaad idinku tihiin." (1 Korintos 3:16, 17; 1 Korintos 6:18, 19).

Qofka hunguriga weyn waa nacayb badanyahay mana istaahilo inuu llaah hor joogo. Waxaan wax u cunnaa inaan noolaano; uma noolin inaan wax cuno. Baahida waxaa lagu cidhib tiri karaa cunto khiyaas ah oo la cuno laakiin kan hunguriga weyn weligiis wuxuu ku jiraa qayli uu leeyahay, "I sii, I sii!"

Hunguri weynida weligeed lama dherjin karo, weligeedna lama buuxin karo. Sida sharciga Axdiga hore uu ahaa qofka hunguriga weyn iyo kan sakhransan dhagax ayaa lagu dili jiray (Sharciga Kunoqoshadiisa 21 : 18-21). "Waayo, kii sakharaan ah iyo kii hunguri weynuba way caydhoobi doonaan, Oo lulona nin calal bay u xidhi doontaa." (Maahmaahyadii 23:21). Xusuuso waxaa jiray nin taajir ahaa, wuuna qab weynaa wuxuuna u addoonsamay damacyadiisa, markuu dhintayna wuxuu isku arkay naarta isagoo aad u xanuunsanaya. Sharka sakhraanimadana haba sheegin abaalgudkeeda. Laakiin dadku sahal bay u qataan. llaah · si cad ayuu eraygiisa nooga sheegaya oo wuxuu leeyahay ma jiro nin sakhraama oo boqortooyada llaah geli doonaa. Biirka ma ahan cunto laakiin waa cabitaan maskaxda iyo maanka lagu wareerinaya, si ay kuwa cabaya si nacasnimo ah ugu dhaqdaan. Waxay noqdaan kuwa shar fala oo weliba way is dilaan oo haddii ay biirka cabi lahayn ficiladaas sharka ah kuma dhaqmeen. "Khamri waa dadquudhsade, waxa lagu sakhraamona waa qaylo-kiciye, Oo ku alla kii ku qaldamaana caqli ma laha." (Maahmaahyadii 20:1).

Kuwa hagaajiya ama gadaya biirka culus iyaguna llaah hortiisa waxay haystaan uun isla abaalkii la siinaya kan sakhraamaya. Maxaa yeelay, llaah wuxuu leeyahay, "Hoog waxaa leh kuwa u xoogga badan inay khamri cabbaan, iyo dadka u itaalka weyn inay qasaan wax lagu sakhraamo, kuwaasoo kan sharka leh xaq ka dhiga laaluush aawadiis, oo ka xaqa ahna xaqiisa ka qaada! "Waxaa iska hoogay kaaga denskiisa khamri cabsiiya, oo cadho ugu shuba, oo weliba u sakhraamiya si uu cawradooda u fiirsada aawadeed!" (Xabaquuq 2: 15). "Arna miyeydnaan ogayn in kuwa xaqa darani ayan dhaxlayn boqortooyadii I laah? Yaan laydin khiyaanayn ama dhillayaasha ama kuwa sanamka caabuda ama kuwa sinaysta, ama khaniisiinta. 1 0 Arna tulgagga, ama kuwa wax badan damca. Arna kuwa sakhraama. Arna kuwa wax caaya. Arna kuwa wax dulma, ma dhaxli doonaan boqortooyadii llaah" (1 Korintos 6:9, 10).

Dembiga baniaadminimadeena waa mid aan lagu wareei karin. Waana kuwan kuwa ka mid ah, "19 Shuqullada jidhku waa muuqdaan, waana kuwan, sino, wasakhnimo, dhillanimo, 20 sanamcaabudid, sixirnimo, cadownimo, dirir, masayr, xanaaq, is-ilaaq, iskala qaybqaybin, bidcinimo, 21 xaasidnimo, sakhraannimo, rabshooyin iyo waxyaalo la mid ah. Kuwaas waan idiinka digayaa, sidaan markii horeba idiinku sheegay, in kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeyaa ayan dhaxli doonin boqortooyada llaah." (Galatiya 5: 19-21). "Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto, laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo:· (Efesos 5: 18).

Ciie wuxuu qof kastoo xaqnimo u ooman ku soo dhoweynaya erayadaan, "Maalintii u dambaysay, oo ahayd maalintii wenayd ee iidda, ciise ayaa istaagay oo qayliyey isagoo leh, Haddii qof uun harraado, ha ii yimaado, hana cabbo. Kii i rumaysta, calooshiisa waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah,' sida Qorniinku u yidhi." (Yooxanaa 7:37-38). "Hoy, kuwiinna oomman oo dhammow, xagga biyaha kaalaya, xataa kii aan lacag haysanow, kaalaya, wax iibsada, oo wax cuna, kaalaya oo khamri i'yo caano lacagla'aan iyo iibla'aan ku qaata." (Ishcyaah 55: 1). "14 laakiin ku alla kii ka cabba biyahaan siin doono, weligiis ma harraadi doono, laakiin biyahaan siin doono waxay gudihiisa ku noqon doonaan ii biyo ka duulayaan tan iyo nolosha weligeed ah." (Yooxanaa 4:14).

Copyright. ANGP

4. DIINKA · Wuxuu calaamad u yahay cajislaw ama ma shaqayste, dhaqso aan addeeceynin iyo sixir ku dhaqasho. Addeecdarroda waxay la mid tahay sixirnimada (1 Samu'eel 15:23). "25 Ninkii caajis ah waxaa dila damaciisa, Wayo,

gacmihiisu waxay diidaan inay hawshoodaan. 26 Waxaa jira kuwo maalinta oo dhan si hunguri weyn wax u damca, Laakiinse kii xaq ahu wax buu bixiyaa oo ma csshado" (Maahmaahyadii 21 :25,26). Yashuca wuxuu reer binu Israa'iil ku yidhi, "Oo iyana waxay ku yidhaahdeen, War kaca oo ina keena aynu ku duullee, waayo, waannu soo aragnay dalkii, oo aad buu u wanaagsan yahay. Miyaad iska aammusnaanaysaan? War ha ka caajisina inaad tagtaan oo aad dalka gashaan oo dhaxashaan." (Xaakiinada 18:9). Dabiicadda baniaadmiga aad ayay uga cajisantahay inay waxyaalaha I laah ku dhaqanto. Ciise wuxuu yidhi, "Wuxuuna ku yidhi, Aad u dadaala inaad iridda cidhiidhsan ka gashaan, waayo, waxaan idinku leeyahay, Qaar badan ayaa dooni doona inay galaan, mana kari doonaan." (Luukos 13:24). "Waayo, mid kasto oo weydiista waa la siiyaa, kii doonaana waa helaa, kii garaacana waa laga furi doonaa." (Matayos 7:8). "Tan iyo wakhtigii Yooxanaa Baabtiisaha boqortooyada jannada waa la xoogay, oo kuwii xoogayna ayaa qaatay" (Matayos 11 : 12).

Haddii aan waxyaalaha badbaadadeena iyo xiriirka aan llaah la leenahay si taxdir la'aan ah ku hogaamino waxaan ku sugannahay dhimashada weligeed ah. Waxay naga reebaysaa inaan ducaysano, inaan doondoonno waxyaalaha waweyn ee llaah, waxay naga reebeysaa inaan balamada llaah doondoono; waxay nagu hogaaminaysaa baaba'a. Markuu llaah kula hadlaya, wuu kaa codsanaya inaad qalbigaada Isaga siisid maanta, sheydaanka wuxuu kuugu odhan karaa go'aankan waxaad gaari doontaa berrito, ama maalma kale oo ay suurtagal tahay, laakiin waan ka xumahay waxaa laga yaabaa inaanad helin fursad kale; waxaadna dhiman doontaa badbaado la'aan iyo Masiix la'aan. llaah 'wuxuu leeyahay, "7 Haddaba waa sidan wax.a Ruuxa Qoduuska ahi leeyahay, Maanta haddaad codkiisa maqashaan, 8 Qalbiyadiinna ha adkaynina sidii wakhtigii dhirifka, Sidii maalintii j.irrabaadda ee cidlada dhexdeeda." (Cibraaniyada 3:7,8). Meqaa qof ayaa xiriirkii ay I laah la lahaayeen ka dhumay oo maalin waliba fursadda ay badbaadada llaah u leeyihiin horay u sii moodiyaa oo ay noqon inay fursaddaas helaan? Maalinta berri ah adiga iskama lihid.

Qobka diinka inta badan waxaa istecmaala kuwa quraafiga ku dhaqma si ay hawlahooda u fuliyaan, waxayna halkan calaamad ugu tahay dembiga ah in quraafinimada la rumaysto laguna dhaqmo sixirka, muucjisooyinka beenta ah iyo ·sadaalinta nolosha, bedelkii ay isku halayn lahaayeen llaaha nool ee iyaga uumay. Weliba markay jarrabaad iyo jiro dadka qabsadaan, silic iyo murugo, waxaan nagula dhiiri gelinaya inaan llaaha nool u yeedhano, waayo, isagu diyaar buu u yahay inuu na gargaaro, intii aan isku halayn lahayn sii sheegid nasiibsasho ah; maxaa yeelay, "Dadka socodkiisa waxaa hagaajiya Rabbiga, Oo jidkiisuu ku farxaa." (Sabuurrada 37:23). "Mid bukaa ma idinku dhex jiraa? Ha u yeedho waayeellada kiniisadda, oo iyagu ha u duceeyeen, oo saliid ha ku mariyeen magaca Rabbiga. 15 Ducadii rumaysad lahu way bogsiin doontaa kii buka, oo Rabbigu waa sara kicin doonaa, oo hadduu dembaabay waa loo dembi dhaafi doonaa. 16 Midkiinba midka kale dembiyadiisa ha u qirto oo ha u duceeyo si aad u bogsataan. Nin xaq ah baryadiisa shaqaysa wax badan bay kartaa" (Yacquub 5: 14-16). llaah wuuxuu lsraa'iliinta ku xukumay uu ku yidhi, "1 o Oo dhexdiinna waa inaan laga helin mid wiilkiisa ama gabadhiisa dab dhex mariya, ama mid faal ku isticmaala, ama mid xiddigo ku faaliya, ama qumay, ama mid wax fala, 11 ama falanfallqw, ama mid qof ruuxaan leh la hadla, ama sixirrow, ama mid kuwa dhintay la hadla. 12 Waayo, ku alla kii waxyaalahaas sameeyaa waa u karaahiyo Rabbiga, oo waxyaalahan karaahiyada ah daraaddood ayaa Rabbiga llaahiinna ahu iyaga hortiinna uga eryayaa" (Sharciga Kunoqoshadiisa 18:10-12). "Haddaba dibadda waxaa jooga eeyihii, iyo saaxiriintii, iyo kuwa sinaysta, iyo gacan-ku-dhiiglayaashii, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo ku kasta oo been jecel ama sheega." (Muujintii 22:15).

"Ha u jeesanina xagga kuwa ruuxaanta leh, iyo saaxiriinta, oo iyaga ha doondoonina yaydnaan nijaasoobine, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga llaahiinna ah:' (Laawiyiintii 19:31). "Oo markay idinku leeyihiin, Talo weydiista kuwa ruuxaanta leh, iyo saaxiriinta hadaaqda oo guryanta, miyaanay dadka waajib ku ahayn inay I laahooda talo weydiistaan? Miyeyse iyaga ku habboon tahay inay kuwa dhintay



Copyright: ANGP

wax u weydiiyaan kuwa nool aawadood? 20 Sharciga iyo markhaati-furka ka fiirsada, oo eraygan hadal waafaqsan haddaanay ku hadlinna hubaal iyaga waaberi uma jiri doono" (Ishacyaah 8: 19,20).

Intii aad buugan sii akhrisanaysid, Ilaah wuu kula hadlaya, oo wuxuu kuugu yeedhaya inaad waddadaada xaqdarrada ah aad ka soo leexatid oo aad ku soo leexatid ama aad nooloshaada siisid Ilaah inuu hogaamiyo, laakiin ruuxa diinka, oo qalbigaada ku jira ayaa fikirado qaldan kuugu dhalinaya si aad ugu degdegin inaad go'aankan gaartid oo wuxuu kuugu abuuraya cabsi. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay, "qoyskayga iyo saaxibadayda maxay odhan doonaan haddii aan Masiixa qaato oo aan dembiyadayda si Masiixinimo ah uga toobadkeeno? Maxaa dhici doonaa hadii aanan mar dambe ka qayb qaadan ciyaaraha dhaansiga, xafladooyinka iyo farxadaha waxyaalaha adduunka? Bedelkii aad ka fikiri lahayd qaymaha Masiixa ku jira, nabaddiisa layaabka leh, farxaddiisa aan erayo . lagu sheegi karin, sharaftiisa, noolol weligeed ah oo ay raynrayn ka buuxdo, waxaad uun u jeesatay inaad waxyaala aad adduunka ku waynaysid ama aad iska mamnuuci doontid markaad Masiixa qalbigaada ku aqbashid, waayo, cabsida baniaadmiga iyo cabsida dhimashada ayaa kuu addoomiyey sheydaanka. Laakiin Masiixa wuxuu u yimid inuu xorayo kuwa weligoodba sheydaanka u hogaansanayeen cabsida ay dhimashada ka qabaan awgeed. (Cibraaniyada 2: 14, 15). Ruuxa cajislaha ah ee kuugu jira ayaa kaa dhigaya mid ku adag inuu addeeco doonista Masiixa oo wuxuu qalbigaada ka dhigaya mid u adag sida qolofka diinka fuusha.

5. SHABEELKA · Shabeetku waa dugaag aad u xun. Nacaybka, xanaaqa iyo iscelin la'aan ayaa inta badan qalbiga dadka xukuma oo inta badan waxay ku qasbaysaa inay dil gaystaan. Waad isku deyi kartaa inaad maamushid, ama aad iska celisid iscelin la'aanta ilaa a'y kaaga soo butaacdo awooddeeda oo dhan. Waxaa wanaagsan inaad ogolaatid inay waxyaalahan yihiin wax qalbigaada ku jira oo aad Ciise ka codsataa inuu kaa xorayo. "Cadho waa naxariisdarro, xanaaqna waa daad, Laakiinse bal yaa xaasidnimo is-hor taagi kara?" (Maahmaayadii 27:4). "Cadhada ka joogso, oo dhirifka ka tag, Hana isku dhibin inaad shar samaysld," (Sabuurrada 37:8). "Xanaaq ha ku degdegin, waayo, xanaaqu wuxuu ku jiraa laabta nacasyada." (Wacdiyaha 7:9). "Laakiinse haatan iska fogeeya waxyaalahan oo dhan, kuwaas oo ah xanaaq, iyo cadho, iyo xumaan, iyo cay, iyo hadalka ceebta ah oo afkiinna ka baxa." (Kolosay 3:8).

Nacasiinta badidood waxay isku dhiiri geliyaan sakhraanimada si ay waxyaala shar ah u sameeyaan ama ay aarudasho u sameeyaan, laakiin waa sida, "Khamrigoodu waa jebiso waabaydeed, Iyo mariidka xun ee jilbiska." {Sharciga Kunoqoshadiisa 32:33). Aargudashadu way u macaantahay qalbiga sharfalaha laakiin waa Ilaah kan edbin doona kuwa xumaanta fala oo dhan. Ciise wuxuu yidhi, "Ku labaad waa kan, Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada. Qaynuun kale oo kuwan ka weyn ma jiro." (Markos 12:31). Oo weliba "jeclaw cadawgaaga" (Matayos 5:44). Ilaah wuxuu balan qaaday inuu noo wada cafin doono qaladaadka aan samaynay oo dhan, haddii aan dadka kale u cafino qaladaadka ay naga galeen. (Matayos 6:12). Ilaah wuu nacaybyahay ruuxa wasakhda ah ee gunuunaca. Qalbiga dadka waxaa ku jira doonista uu qofka jacaylyahay inuu dagaal galo uu wax dillo, haddaba sidaas daraaddeed, nabadda dhabta ah waa inay ka dhalata qalbiga haddii la doonaya inay ahaato nabad waarta.

6. MASKA · Wuxuu beertii Ceden ku khiyaanay Xaawa oo wuxuu jebiyey xiriirkii macaanaa iyo jaalnimadii ay la lahaayeen Ilaah. Shkeydaanka aad buu uga maseray Aadan iyo Xaawa, marku arkay inay xukumaadcia adduunka gacanta ku hayaan, oo ay xiriir wanaagsan la leeyihiin Ilaah oo meeshiisi jagadiisii qabsadeen. Masayr daraaddiis ayuu sheydaanka abaabulay baaba'ooda, wuuna ku guulaystay inuu burburiyo saaxibtinimadii iyo nooloshii wanaagsanayd oo ay Ilaah la lahaayeen Ilaah. Isla xumaantaas iyo nacaybkaas ayaa weli ku jira qalbiga dadka oo markay arkaan dad kale oo faraxsan oo ay noolashooda fiicanahay waxay isku deyayaan inay burburiyaan.



Copyright ANGP

Masayrka wuxuu qofka ku dhalinaya fikir shar ah oo ah inuu burburiyo dadka kale, oo weliba burburkaasi wuxuu noqon karaa dil. Kan weliba inta badan waxay ku jirta noolosha kuwa guursaday. "Waayo, hinaase waa nin cadhadiis. Maalinta aarsashadana isagu ma tudhi doono" (Maahmaahyadii 6:34). Xagga beecsahara iyo xagga noolosha guud e lagu noolyahayba waxay keentaa silec iyo nacayb aan afka laga sheegi karin. Xataa shaqaalaha Masixiinta, kuwa wacdiyaan iyo wadaaddahaba kama maqno hinaaska maxaa yeelay kan wacdinaya hadduu arko qofka isaga ka hoos shaqaynaya oo wacdigiisa ay noolol ku jirto way hinaasayaan. Wa;J. inay si joogta ah iisu ilaaliyaan, oo waa inuu jacaylka dhabta ah ee I laah uu uu qalbigooda ku jiraa kaa uu qalbiyadeena ku soo shubay Ruuxa Qoduuska ah ee llaah (Rooma 5:5), haddii kale adeegga ay I laah u adeegayaan iyo qaymahooda oo dhar. wuxuu noqonaya mid uu hinaaska burburiyey.

7. RAKAHA · Wuxuu halkan macna u yahay dembiga qab weynida iyo jacaylka lacagta loo qabo kaa oo ah aasaaska sharka oo dhan (1 Timoteyoos 6:10). Waxaa la arkay nooc rahe ah oo ku nool wadanka Kongo oo siduu quraanjo u cunayay calosha ka dilaacay oo dhintay. Qofka qabweynida qaba ma ahan mid gacmahiisa masaakiinta u furaya oo wax siinaya, laakiin wuxuu isku deyaya inuu haddii ay si xaq ah ahaato iyo haddii ay xaqdarro ahaataba uu maal adduunka ku badsado. Ciise naftiisa wuxuu yidhi, "Maal ha ku urusanina dhulka, meesha aboorka iyo miridhku ku baabbi'iyaan, iyo meesha tuugaggu jebiyaan oo ka xadaan, laakiin maal ha ku urursanina dhulka, meesha aboorka iyo miridhku ku baabbi'iyaan, iyo meesha tuugaggu jebiyaan oo ka xadaan. Waayo, meesha maalkaagu ku jiro, meeshaasaa qalbigaaguna ku jiri doonaa." (Matayos 6:19-21). Haddii aan ka akhrino Baybalka (Yashuca 7) waxaan arkaynaa in nin iyo qoyskiisa oo dhan dhagax lagu dilay maxaa yeelay, ninku wuxuu jeclaa dahab, luul iyo dhar. Yuudas Iskariyot kan ka mid ahaa xerta Masiixa, wuxuu iisu ceejiyey lacag jecayl taa uu ku dafiray Rabbigiisa iyo Sayidkiisa. Ma ahan lacagta ama dahabka waxa sharka ah laakiin waa jacaylka lacagta ama maalka loo qabo oo ku qarsoon qalbiga dadka. Kumaan kun oo ruux oo ay ka tirsanyihiin dumar iyo ragba oo jaga kala duwan qabaan waxay a qayb qataan tartamada kala duwan oo qaribay nooloshooda io noolosha qoyskooda iyagoo rajaynayaan inay taajirnimo degdeg ah helaan waxayna saa ku samaynayaan qamaarka iyo bakhti nasiibka. Tartamada ay ka qayb qaadanayaan waxaa ka mid ah tartamada faraska, eeyaha iwm. Damaca lagu doonaya in si dhaqso ah taajir lagu noqdo iyadoon la shaqaysan waxay keeni kartaa qofka inuu tuug noqdo ama uu qof dilo amaba uu isceejiyo. Jacaylka lacagta iyo qab weynida waxaa jiraan waxyaala badan oo la socda, sida caannimo ama magacdheeri, madaxdinimo sida awoodda siyaasinimada oo dadka kale lagu xukumaya, awoodda maalka si masaakiinta loo cadaadiyo; awoodda culumanimada, aad u xisaynta magaca haayad ay Kiniisadda leedahay bedelkii llaah la xiisayn lahaa, ka hor imaadka qof kastoo cunugga llaah ah oo Masiixa · raacsan oo aan Kiniisaddiisa ama ururkiisa ka tirsanayn -(Markos 9:38}. Ciise wuxuu yidhi, "Wuxuu iyaga ku yidhi, Fiiriya oo iska ilaaliya damacnimada oo dhan, waayo, qof goortuu maal badnaado, noloshiisu kama timaado maalkuu leeyahay." (Luukos 12: 15). Waxaa jirtaa sheeko nin taajir ah ku saabsan oo leh, "Markaasuu masaal kula hadlay oo ku yidhi, Nin hodan ah dhulkiisa ayaa wax badan bixiyey. 17 Kolkaasuu isla tashaday isagoo leh, Maxaan sameeyaa, waayo, ma haysto meel aan ku ururiyo wixii ii baxay? Markaasuu yidhi. Sidan ayaan samayn doonaa. Maqsin-nadaydii ayaan dumin doonaa . oo kuwa ka waaweyn ayaan dhisan doonaa; halkaasna ayaan ku urursan doonaa sarreenkayga iyo alaabtayda oo dhan. Oo waxaan naftayda ku odhan doonaa, Nafay waxaad leedahay alaab badan oo sannado badan loo dhigay. Naso oo wax cun oo cab 'oo farax. Laakiin llaah wuxuu ku yidhi, Kaaga doqonka ahow, caawa naftaada waa lagu weydiisan doonaa, wixii aad diyaarsatayna yaa lahaan doonaa'? Sidaas oo kale weeye kan maal urursada oo aan llaah u hodan ahayn" (Luukos 12:16-21). "Waayo, nin maxay u taraysaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu naftiisa lumiyo?" (Markos 8:36). "22 Markaasuu xertiisii ku yidhi, Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay, Ha ugu welwelina naftiinna waxaad cuni doontaan, jidhkiinnana waxaad huwin doontaan. 23 Waayo, naftu waa ka roon tahay cuntada. jidhkuna waa ka roon yahay dharka. 24 Tukayaasha fiiriya, waayo, waxba ma beeraan, waxna ma gurtaan, mana haystaan maqsin ama meel ay wax ku urursadaan, oo llaah baa cunto siiya. lntee baad ka roon tihiin shimbirraha! 25 Midkiinnee intuu

Copyright ANGP

welwelo, dhererkiisa dhudhun ku dari kara? 26 Haddaba haddii aanad samayn karin xataa waxa u yar, maxaad ugu welweshaan intii kale? 27 Fiiriya ubaxyada, siday u baxaan, ma ay shaqeeyaan. ma ayna miiqdaan. Weliba waxaan idinku leeyahay, Xataa Sulaymaan wakhtiga ammaantiisii oo dhan dhar uma uu gashan jirin sida kuwan midkood. 28 Laakiin haddii llaah sidaa u huwiyo cawska maanta duurka ku yaal oo berrito moofada lagu ridayo, sidee ka badan ayuu idiin huwin-ayaa, rumaysad yarayaalow? 29 Ha doondoonina waxaad cuntaan iyo waxaad cabtaan, oo ha shakiyina, 30 waayo, quruumaha dunidu waxaas oo dhan ayay doondoonaan; laakiin Aabbihiin waa og yahay inaad waxaas u baahan tihiin. 31 Laakiin doondoona boqortooyadiisa. oo waxaas oo dhan waa laydiinku dari doonaa. 32 Ha baqina, ido yahow yari, waayo, Aabbihiin waxaa ka farxiya inuu boqortooyada idin si iyo. 33 libiya waxaad leedihiin oo sadaqo bixiya. Samaysta kiishash aan duugoobaynin, oo maal aan dhammaanaynin ku urursada jannada, meesha aan tuug ku soo dhowaan oo aan aboor ku baabi'in. 34 Waayo, meesha maalkiinnu ku jiro meeshaasaa qalbigiinnuna ku jiri doonaa." (Luukos 12:22-34). ·

8. SHEYDAAN · Aabbaha beenta oo dhan iyo kuwa beenta sheega oo dhan, ayaa ah kan naga dhaadhicinaya inaan dembaabno, waana xukumaha qalbiga. Ciise wuxuu yidhi, "ldinku waxaad tihiin kuwo aabbahood lbliiska yahay, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan damacyada aabbihiin. Tan iyo bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig qaba. runtana kuma uu joogsan, waayo, runtu kuma jirto isaga. Markuu been ku hadlo, tiisuu . ku hadlaa, waayo, waa beenaaleh, waana beenta aabbaheed." (Yooxanaa 8:44). Beenta yar waxay la mid tahay tan weyn. Waxaa jirtaa been qoraal lagu sheego, lagu hadlo ama lagu ficiltamo. Qofka laba wejiilaha ah waa beenaale maxaa yeelay, wuxuu iska dhigaya wax uusan ahayn. llaah beenaala ma ahan - oo Masixiintana been waa inaanay sheegin (Tiitos 1 :2). "Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno," (1 Yooxanaa 1 :6). "Haddaba dibadda waxaa jooga eeyihii, iyo saaxiriintii, iyo kuwa sinaysta, iyo gacan-ku-hiiglayaashii, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo ku kasta oo been jecel ama sheega:· (Muujintii 22: 15). "Markhaati been ah oo been sheega, Iyo kii muran dad walaalo ah ku dhex beera." (Maahmaayadii 6: 19).

9. XIDDIGGA - Wuxuu calaamad u yahay fikirka ku jira qalbiga dadka. Halkan wuxuu ka yahay wasakh iyo shar, waxaana laga yaabaa inuu ku dhintay dembiga joogtada ah; waa la indha tiray wuxuuna noqday mid u hogaansamay sheydaanka, si uusan mar dambe u awoodin inuu xukumo ficiladiisa. Shar kufikirkaan waxaa laga yaabaa inuu mararka qaarkood uu yahay mid degan, mara qaarkoodna mid shuddo badan. Bedelkii ay qaladeeka ogolaan lahayd ayay eedeyn bilaabaysaa, oo markay eedeyn lahaydna way is ayay qaladkeeda ogolaanaysaa. Waxaa laga yaabaa inay dhimatay sida iyadoo bir qulul lagu gubay, waxayana lumisay dareemadeeda oo dhan ku lumisay iimaanka ay ka fogaatay, addeecidda ruuxyada beenta ah iyo raacidda waxbariida sheydaanka, iyo weliba dhagaysadka ay dhagaystaan waxyaalaha ay baraan kuwa beenta ku dhaqma (1 Timoteyos 4: 1 ,2; Cibraaniyada 10:22).

10. ISHA - Isha llaah wax kastoo qalbiga dadka ka dhex dhacaya ayay aragtaa. Wax ishiisa laga qarin karo ma jiraan, sidaa daraaddeed wuu ogyahay wuuna arkaa sir kastqa iyo fikir kasto iyo doonista qalbigaba. Haddii aad sharka aad samaynaysid ku samaysid meesha ugu mugddiga badan habbeenki ama duura ugu jaqda weyn, ama meesha dhulka ugu hoosays, ama meel alla meeshay ahaataba I laah wuu arkaya. (Indhaha sawirkaan ku jira waxay haddana gacan siinayan aragga wejiga banaadmiga).

11. CARRABADA YARYAR E DABKA AH - Agagaarka wadnaha waxaan ka arkaynaa jacaylka llaah oo ku wareegsan qalbiga dadka. Inkastoo uu llaah dembiga nacaybyahay, wuu jacaylyahay banaadmiga

Copyright: ANGP

oo ma doonaya inuu hal qofna dembigiisa ku dhinto, laakiin wuxuu doonaya inuu dembiyadiisa ka soo noqdo uu badbaado ama uu noolaado (2 Butros 3:9). Ciise wuxuu u yimid inuu badbaadiyo dembiilayaasha. Farxad weyn ayaa ka jirta xagga samada markuu hal qof oo demiila ahaa toobad keeno (Luukos 15:7). Carrabada yaryar waxay haddana macnaynayaan dhiigga Ciise Masiix, "Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega Wanka llaah ee dembiga dunida qaadaya." (Yooxanaa 1 :29).

12. MALAA'IGTA · Waxay · meteleysaa erayga llaah. ilaah wuxuu doonaya inuu la hadlo kuwa la lumiyey oo xabaarsan culaab weyn oo dembi ah, si ay uga soo leexdaan waddooyinkooda xaqdarrada ah si ay qalbiyadooda ugu hogaamiyaan iftiinka iyo jacaylka llaah.

13. QOOLLEYDA · Waa calaamadda Ruuxa Qoduuska ah, Ruuxa cadaynaya runta llaah ku saabsan, waxa dembiga ah iyo waxa xaqa ah, iyo weliba wax ku saabsan maalinta xukunka llaah (Yooxanaa 15:26). Ruuxa Qoduuska ah waxaan arkaynaa inuu banaanka ka joogo qalbiga qofka. Ruuxa qoduuska ah kuma noolaan karo meel uu dembi xukumaya.

Haddii aad ogaatay inay sawirada qalbigaada ay yihiin sida calaamadaha sawirkan ku jira, Rabbiga u barooro, qalbigaada u fur Isaga, oo ruurka eraygiisa ha kuu ifo. "Rumayso Rabbi Ciise, waana lagu badbaadin doonaa" (Faalimaha Rasullada 16:31). llaah diyaar buu kuu yahay, haah, wuxuu balan qaaday inuu qalbigaada bedeli doono haddii aad u ogolaatid si uu kuu siiyo qalbi cuseb iyo noolol cuseb. (Yexesqeel 11 : 19). Tan waxaa laga macnayay sawirka labaad.

## 2. QALBIGA OGOLAADAY INUU DEMBIILA YAHAY

Sawrikan wuxuu tusaya qalbi toobadkeenaya oo doondoonaya llaah. Maalaa'igta waxay haysataa seef, erayga llaah, "Waayo, hadalka llaah wuu nool yahay, waana shaqeeyaa, oo waa ka af badan yahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka dhex dusaya ilaa kala soocniinta nafta iyo ruuxa, iyo xubnaha iyo dhuuxaba, waana kala gartaa fikirrada iyo waxyaalaha qalbiga ku jira:' (Cibraaniyada 4:12). Erayga llaah wuxuu leeyahay, Waayo, mu-shahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda llaah waa nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix:· (Rooma 6:23). Oo weliba, "Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukurno," (Cibraaniyada 9:27). "Laakiinse kuwa fulayaasha ah, iyo kuwa aan rumaysan, iyo kuwa karaahiyada ah, iyo gacano ku-dhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo saaxiriintaa, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo beenlowyada oo dhan waxaa qaybo toodu ku jiri doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu ka ololayaan, oo taasuna waa dhimashada labaad." (Muujintii 21 :8).

Malaa'igta waxay gacanta kale ku haysaa lafta madaxa. Tan waxay dembiilaha xusuusinaysaa inaan wada dhiman doonno. Jidhkeenan aan aad u jecelnahay oo aan quudino, huwino, qurxino, oo aan dhibkaan oo dhan u marayno si aan u qancino damaciisa iyo wuxuu u baahanyahay oo dhan, wuu dhiman doonaa wuuna qurmi doonaa, oo tixra ayaa baabi'in doonaa laakiin qalbigeena iyo ruuxeenaba weligood ayay noolaan doonaan, oo maalin ayay hor istaagi doonaan Masiixa hortiisa, si uu u xukumo · (2 Korintos 5: 1 O}.



Halkani waxaan arkaynaa dembiilaha oo fahmaya waxyaalaha uu erayga Ilaah leeyahay oo qalbigiisa u furaya Ilaah. Ruxuuxa Qoduuska ah ee Ilaah ayaa ku fitiimaya qalbigiisa dembiga lahaa. Iftiinka Ilaah ayaa qalbigiisa soo gelaya oo baabi'inaya mugdigii oo dhan. Markuu iftiinka Ilaah soo gala, mugddiga waa inuu taga. Dembiga halkan loogu macnayay xayawaanadan kala duwan waa inuu ka baxa qofka. Haddaba akhristow, u ogolow Ciise, iftiinka dunida, inuu qalbigaada soo gala, sida aan uga arkayno sawirkan. Ciise wuxuu yidhi, "Haddaba Ciise ayaa mar kale la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gud-curka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka noloD sha ." (Yooxanaa 8: 12). Weligaa kuma halgankaaga, xigmaddaada ama xigmadda dadka kagama saari kartid dembiga qalbigaada ku jira. Habka keliya oo ugu sahlan, ugu dhaqsada badan, oona la hubo waxaa waaya inaad iftiinka Ciise Masiix ku soo gala, gudcurka ahaa dembigana waa inuu cagahiisa wax ka deya uu baneeyo qalbigaada., Bisha iyo xiddigaha waxay na siin karaan in yar oo iftiin ah habbeenkii, laakiin markay qoraxdu soo baxdo, mugdiga iyo iftiinka yarba way lumayan.

Ciise waa qoraxda xaqnimada. Markuu galay macbudkii ku yaalay Yeerusaalem, wuu ka fiijiyey kuwii wax iibsanayeen iyo kuwi iibinayaba. Wuu dabageddiyey miisaskii kuwii lacagta sarafayay iyo kuraastii kuwii qoolleyda iibinayay, isagoo leh, "Wuxuuna ku yidhi, Waa qoran tahay, Gurigayga waxaa loogu yeedhi doonaa guriga tuka shada, laakiin waxaad ka dhigaysaan god tuugo." (Matayos 21 : 13). Qalbigaada waxaa loogu talagalay inuu ahaado guriga Ilaah, macbudka Ilaah. Wuxuu doonaya inuu ku dhex noolaado, uu qurxiyo, uu iftiin ka buuxiyo, iyo weliba inuu ka buuxiyo jacayl iyo farxad. Ciise uma uusan iman oo keliya inuu deambiyadeena noo cafiyo, laakiin wuxuu u yimid inuu naga xorayo awoodda iyo ku dhexnoolaanshaha dembiga. "Sidaas aawadeed haddii Wiilku idin xoreeyo, runtii xor baad ahaan doontaan." (Yooxanaa 8:36).

## 3. QALBIGA TOOBADKEENKA LEH.

Sawirkan wuxuu na tusinaya dembiile diyaar u ah 'inuu dembiyadiisa ka toobadkeeno. Hadda wuxuu fahmay muhimadda ku jirta inuu dembiyadiisa siiyo Ciise Masiix kan ugu dhintay iskutallaabta. Intuu arkaya iskutallaabta taa ay Malaa'igta, erayqa Ilaah, ay tustay isaga, waxayna jilcinaysaa qalbigiisa ka xun dembiyada uu falay, aad ayuuna uga xunyahay wuuna ka maruqaysanyahay dembiyada uu samayay. Intuu arkaya jacaylka Ilaah oo Ciise Masiix lagu tusay qalbigiisa wuu sii jilacsanaanaya,

weliba markuu ka fikiro inuu Ciise Masiix, wiilka llaah u yimid inuu dembiyadiisa ka qaado, maxaa yeelay, wuxuuba go'aansaday inuu uga dhinto iskutallaabta.

Madaama Ciise la karbaashay, oo qodxan taaj looga dhigay, oo gacmaha iyo lugahaba laga iskutallaabta loogu musmaaray dembiyadeena aawgood, si fiican ayaa looga dhaadhiciyey qalbiga dembiilaha, oo aad bay u bedeleysaa qalbigiisa iyo nooloshiisa. Intuu akhrisanaya erayga llaah uu naftiisa iska arkaya sida muraayad ahaan, wuxuu arkaya sida daran uu llaah uga fogaaday oo uu ugu xadgudbay amaradiisa. Waxaa qalbigiisa ka buuxsamaya murugo iyo calool xumo oo intuu qalbigiisa llaah ku hor geynaya baroorasho iyo calool xumo, Ciisena aad buu isaga ugu soo dhowaanaya. Jacaylka iyo nabadda llaah ayaa isaga geleysa intuu sii fahmaya "Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa, oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifiyaa dembi oo dhan." (1 Yooxanaa 1 :7). "llaahow, igu dhex abuur qalbi nadiif ah, Oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman." (Sabuurrada 51 :10). Haddana erayga l laah wuxuu leeyahay, "Waayo, waxyaalahan oo dhan gacan-taydaa samaysay, oo waxyaalahan oo dhammuna way wada ahaadeen, ayaa Rabbigu leeyahay, laakiinse ninkan waan fiirinayaa kaasoo ah miskiin, ruuxiisuna jaban yahay, eraygaygana ka gariira:' (lshacyaah 66:2). Ruuxa qoduuska ah ee llaah ayaa u



cadaynaya erayga llaah "Kolkaasay waxay u keeneen nin curyaan ah oo sariir ku jiifa. Ciise oo rumaysadkooda arka ayaa ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, kalsoonow, dembiyadaadu waa kaa cafiyan yihiin:· (Matayos 9:2). Intuu weli eegaya iskutallaabta iyo dhiigga Ciise Masiix kaa oo iskutallaabta lagu daadiyey, isagoo rumaysanaya inay waxyaalahan oo dhan u dheceen dembiyadiisa awgood, wuxuu bilaabaya inuu lahaado qalbi cuseb oo ah in xulayskii dembiga oo dhan laga qaaday, maxaa yeelay, Ciise ayaa u dulqaatay silicii aan annaga silci lahayn; waayo erayga llaah wuxuu leeyahay, "Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday. Oo llaah dilay, oo dhibaataysan. 5 Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bog-sannay." (lshacyaah 53:4,5).

Ruuxa qoduuska ah iyo jacaylka l laah ayaa hadda kaddib xukumaya qalbigaas la nadiifiyey. Intuu Ciise ku sii barbaaraya wuxuu hubsanaya in dembiyadiisa la cafiyey, sidaa daraaddeed wuxuu noqonava qof

aan mar dambe ka welwelaynin inuu qalbigiisa nadiif yahay uu dhiigga Ciise Masiix, wiilka Ilaah, ayaa ka nadiifiyey dembiyadiisa oo dhan sida ku dhigan 1 Yooxanaa 1 :7. Hadda wuxuu xaqiiq u leeyahay in mid alla kii Ciise rumaystaa uusan xagga ruuxiyanka ka lumi doonin, laakin wuxuu lahaan doonaa noolosha weligeed ah (Yooxanaa 3:16). "Isaga, sida ay hodantinimada nimcadiisu tahay, waxaynu dhiiggiisa ku leennahay madaxfurasho ah dembidhaafkeenna." (Efesos 1 :7). Damacyadii baniaadmiga ee dembiga ahaayeen hadda waxay fursad siiyeen damac weyn oo loo leyahay in I laah doonistiisa la raaco loona adeego Isaga oo keliya "Kan ugu horaynta na jeclaaday" (1 Yooxanaa 4: 19). Bedelkii uu jeclaan lahaa dunida iyo waxyaalaha dunida, wuxuu jeclaanaya llaah iyo waxyaalaha llaah. Haddaba sawirkan waxaan ku arkaynaa in xayaanadii dembiga metelayay ay hadda qalbiga banaanka ka joogaan inkastoo uu sheydaanka doonaynin inuu ka maqnaado hoygiisi hare, wuxuu isku deaya inuu dib u eego si uu u nasiisado inuu fursad kale heli karo. Sidaa daraaddeedd ayuu Rabbigeena Ciise Masiix nagu waaninaya inaan si joogta ah u ducaysano; si aan iskiiga hor staagno sheydaanka si nooga cararo (Yacquub 4:7).

## 4. SAWIRKA AFRAAD




Sawirkan wuxuu na tusaya qof Masiixi ah oo helay nabadda dhabta ah iyo badbaadada weligeed ah oo dhimashada Rabbigeena iyo badbaadiyaheena, Ciise Masiix, oo ma qabo wax kale uu ku kibro oo aan ka ahayn "Laakiinse yaanay noqon inaan wax kale ku faano iskutallaabta Rabbigeenna Ciise Masiix mooyaane, tan dunidu iigu mus-maarantay, anna aan dunida ugu musmaarmay" (Galatiya 6: 14). Ciise iskutallaabtuu ku dhintay si aan annaguna "Oo isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhi-mannay aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen xarijimihii karbaashiddiisii." (1 Butros 2:24); qofkani waa Masiixi dunida ka dhintay. Waxaa nagula amraya sida qoran, "Laakiin waxaan leeyahay, Ruuxa ku socda, kolkaas aydnaan damaca jidhka yeelayne... Haddii aynu Ruuxa ku nool nahay, aynu Ruuxana ku soconno." (Galatiya 5:16,25).

Tiirkii Masiixa lagu qodbay markay qaawiyeen isaga, waxaan ka arkaynaa sawirkan wadnaha, iyo weliba karbaashtii ay isaga ku karbaasheen. Waxaa isaga loo edbiyey dembiyadeena maxaa yeelay, "Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse

ANGP

waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday. Oo llaah dilay, oo dhibaataysan. 5 Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu · ku bog-sannay." (Ishacyaah 53:4,5). Herodo iyo askartiisii ayaa ku jesjeseen Isaga, oo markay Isaga karbasheen, waxay madaxiisa ku riixeen taaj qodxan ah - bedelkii ay Isaga u gelin lahaayeen taaj dahab ah, oo waxay gacantiisa midigta ah geliyeen ul - bedelkii ay u gelin lahaayeen barkoorada boqortinimada, oo Isagay ku hort dugeen oo ku jesjeeseen iyagoo leh, "27 Markaasaa taliyaha askartiisii waxay Ciise geeyeen guriga taliyaha oo waxay isaga ku soo ururiyeen askartii oo dhan. 28 Dharkiisii ayay ka qaadeen oo waxay u geliyeen dhar guduu dan. 29 Markaasay taaj qodxan uga taxeen oo madaxiisay saareen, cawsduurna gacantiisa midigtaa ayay u geliyeen, oo jntay hortiisa jilba joogsadeen oo ku majaajiloodeen ayay waxay ku yidhaahdeen, Nabad, Boqorka Yuhuuddow. 30 Wayna ku candhuufeen, markaasay cawsduurkii ka quadeen oo madaxay kaga dhufteen. 31 Oo goortay ku majaajiloodeen dabadeed ayay dharkii ka qaadeen oo dharkiisii bay u geliyeen, markaasay, wadeen in iskutallaabta lagu qodbo." (Matayos 27:27-31).

Waxaa jiraan kuwa badan oo loogu yeedhay magaca Masiixnimada oo ducaysanayaan, oo miiska Rabbiga ama cashada ugu dambaysay ka qaybqaata, oo qasiidooyinka llaah qaada oo laakiin, ficiladooda sharka ah mar kasta Rabbiga iskutallaabta ku saaraya (Cibraaniyada 6:6). "21 Ma aha qof kasta oo igu yidhaahda, Rabbow, Rabbow, kuwa boqortooyadij jannada gelayaa, laakiin kii sameeya doo-nista Aabbahayga jannada ku jira, kaasaa gelaya. 22 Maalintaas qaar badan baa igu odhan doona, Rabbow, Rabbow, miyaannaan magacaaga wax ku sii sheegin, oo miyaannaan magacaaga jinniyo ku saarin, oo miyaannaan magacaaga wax badan oo xoog leh ku samayn? 23 Markaasaan ku odhan doonaa, Weligay idinma aqoon, iga taga dembifalayaalow. 24 Haddaba qof kasta oo hadalladaydan maqla oo yeela, waxaa loo ekaysiinayaa nin caqli leh oo gurigiisa ka dul dhisay dhagaxa. 25 Roobkii ayaa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen gurigaas, ma uuna dumin, waayo, waxaa laga dul dhisay dhagaxa. 26 Qof kasta oo hadalladaydan maqla oo aan yeelin, waxaa loo ekaysiinayaa nin doqon ah oo guri-giisa carrada ka dul dhisay. 27 Roobkii waa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen guri-gaas, wuuna dumay dumiddiisuna waa weynayd" (Matayos 7:21-27).

Sawirkaan waxaan kaloo aan ka arkaynaa boorsad ay lacag ka buuxo taa uu iska leeyahay Yuudas Iskariyot, kan dafiray Rabbigeena Ciise Masiix oo oo soddon beni siistay, maxaa yeelay, jacaylka lacagta ayaa qalbigiisa addoonsaday oo falkaas shar ah keli unbuu ku fikiri karay. Taaha, silsiladaha iyo waxyaalaha kale oo dhan waa wixii ay askarta istecmaaleen habbeenkii ay Ciise gacan gelinayeen. bahalka ciyaarta khamaarka lagu nasiibsado waxay askartii u istecmaashay inay dharkiisa khamaar ku ritaan si ay ku ogadaan kii qaadan lahaa. "Dharkayga bay qaybsadaan, Oo maradaydana saami bay u ritaan" (Sabuurrada 22: 18). Wax kasta ayay ka qateen Ciise, laakiin nafahaantiisa way inkireen waayo, waxay yidhaahdeen, "ma doonayno inuu ninkan boqorkeena ahaado." Dadka inta badan way jacaylyihiin inay barako kasta ka helaan llaah, roobka, qoraxdu iyo wixii la mid ah laakiin ma doonayaan inay llaah isa siiyaaPl oo ay Isaga u adeegaan sida Rabbigooda iyo Sayidkooda. Dadka inta badan waxay llaah u rabaan uun inuu markay dhibanyihiin uu ka samata bixiyo.

"33 Laakiin markay Ciise u yimaadeen oo ay arkeen inuu durba dhintay kama ay jebin lugihii. 34 Laakiin mid askartii ka mid ah ayaa dhinaca Ciise waran kaga wareemay, oo markiiba waxaa ka soo baxay dhiig iyo biyo. 35 Oo kii arkayna wuu marag furay, maraggiisuna waa run, wuuna garanayaa inuu run sheegayo, inaad idinkuna rumaysataan. 36 Waayo, waxyaalahaas waxay u dhaceen inuu ahaado Qorniinka leh, Lafihiisa midna la jebin maayo. 37 Oo Qorniin kale wuxuu leeyahay, arki doonaan kii ay wareemeen" (Yooxanaa 19:33-37) Intuusan diiqa ciyin ayuu Butros Ciise inkiray oo ku yidhi ku garan maayo, laakiin mar dambe ayuu aad uga xumaaday wuxuuna weydistay cafis (Matayos 26:69-75). Miyaad si bayaan ah u qiranaysaa inaad qalbigaada siisay Ciise Masiix, ficiladaada iyo hadalkaaguba? Mise weli waad ka xishoonaysaa inaad dadka kale u sheegtid? Ciise wuxuu yidhi, "Sidaa darteed mid walba oo igu qirta dadka hortiisa, anna waan ku qiran doonaa Aabbahayga jannada ku jira hortiisa. 33 Laakiin ku alla kii igu dafira dadka hortiisa, anna waan ku dafiri doonaa Aabbahayga jannada ku jira

hortiisa" (Matayos 10:32,33). Ciise haddana wuxuu yidhi, "Kan aan iskutallaabtiisa soo qaadan oo aan i soo raacin, ima istaahilo" (Matayos 10:38).

## 5. SAWIRKA SHANAAD

Sawirkan wuxuu ina tusaya qalbi nadiif ah oo la daahiriyey oo ah dembiile lagu nadiifiyey nimcada iyo naxariista llaah oo aan weligood idlaanaynin. Waa qalbi noqday macbudka llaah ee dhabta ah, iyo guriga llaaheena Aabbaha ah, wiilka iyo Ruuxa Qoduuska ah isla sida uu Ciise Masiix inaga balan qaaday markuu yidhi, "Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Haddii nin i jecel yahay, hadal-kayguu xajin doonaa, Aabbahayna waa jeclaan doonaa, oo wannu u iman doonnaa, waanna la joogi doonnaa" (Yooxanaa 14:23). llaah wuu ixtiramaa, wuu barakayaa oo weliba wuxuu baniaadmiga ku saraysiyaa Ciise Masiix. (Luukos 1 :52).




Qalbigaan hadda wuxuu noqday macbudka runta ah ee llaah. Dembiga waa laga saaray. Bedelkii xayawaanadii uu sheydaanka xukumayay, aabbaha beenta oo dhan, waxaan arkaynaa Ruuxa qoduuska ah ee llaah, ruuxa runta, oo ku dhex nool qalbigaasi. Bedelkii uu qalbigaasi ahaan lahaa meesha uu dembiga ku tarmaya, wuxuu noqday meel qurux badan oo beer miro dhal leh ah oo wuxuu dhalayaa miraha ruuxa, sida jacaylka, farxadda, nabadda, dulqaadashada, ishoosaysinta, naxariista, samaanta, aaminimada, iscelinta iyo kuwa kale oo l laah hortiisa iyo dadka hortooduba aqbal ka ah (Galatiya 5:22-23). Hadda wuxuu noqday laanta dhabta ah ee canabka - Ciise Masiix ku taala oo midho dhal leh. Sirta keliya oo ku jirta in midho la dhalo waa in Ciise lagu jiro, oo qofkuna waa inay ku jiraan Masiixa iyo erayadiisa (Yooxanaa 15: 1-1 O). Isla sida uu isaguba uga buuxsamay Ruuxa qoduuska ah uu u baabtiisay, wuxuu leeyahay awood uu kaga hor yimaado waxyaalaha caadiga ah oo baniaadmiga dembaajiya waana inuu ka wada dhinto waxyaalahaas oo dhan (Galatiya 5:24). Ruuxa qoduuska ah ee llaah ayaa nooloshiisa hogaaminaya, mar dambena ma qancin doono waxyaala doonista jidhka ah (Galatiya 5: 16).

Qof kani mar dam be kuma noolaan doono waxyaala uu arkaya, maqlaya, uu dareemaya, laakiin wuxuu ku socon doonaa iimaan maxaa yeelay erayga llaah wuxuu leeyahay, "Ku alla kii ka dhashay l laah, wuxuu ka adkaadaa dunida, oo waxaa libta ka adkaata dunida ah rumaysadkeenna." (1

Yooxanaa 5:4). Wuxuu ku noolyahay dhiirigal iyo rajo waxaana xooggiisa ah soo noqoshada dambe ee Ciise Masiix. Wuxuu ku noolyahay waaya aragga jacaylka llaah, kaa oo ah mid aanan dhamaanaynin.

"Waxaa barakadaysan kuwa qalbiga ka daahirsan, waayo, llaah bay arki doonaan.' (Matayos 5:8). Boqor Daa'uud inkastoo u taajir ahaa ama uu ahaa mid cadawgiisa oo dhan ka guulaystay, wuxuu ogaaday dagaalka kan ugu weyn inuu yahay kan uu kaga guulaysanaya qalbigiisa si uu u ogaado baahida ugu weyn ee qalbigiisa ku jira inay tahay tan ruuxiyanka ah ama xiriirka uu llaah la leeyahay. Wuu ducaystay oo wuxuu yidhi, "llaahow, igu dhex abuur qalbi nadiif ah, Oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman. (Sabuurrada 51 :10). Ma jiro qof qalbigiisa nadiifin karo ama isku abuuri karo qalbi daahir ah, hab keliya waa uun in llaah loo toobad keeno isla sidii uu Daa'uud yeelay, markuu yidhi "llaahayow, igu dhex abuur qalbi nadiif ah". llaah wuxuu doonaya inuu wax cuseb qalbigaada ka dhex sameeyo. Wuxuu doonaya inuu dilaaca qalbigaada uu tolo, waxyaalaha aad adiga iska dhaadhicinaysid ma ma siinayaan hoy uu ku farxo. I laah aad buu u doonaya inuu ku gargaaro, maxaa yeelay, wuxuu balanqaaday, "Oo markaasaan biyo nadiif ah idinku kor rushayn doonaa, oo idinna nadiif baad ahaan doontaan, oo waxaan idinka nadiifin doonaa wasakhdiinnii oo dhan iyo sanamyadiinnii oo dhanba Oo weliba waxaan idin siin doonaa qalbi cusub, oo ruux cusubna waan idin gelin doonaa; jidhkiinnana qalbigii dhagaxa ahaa baan ka dhex bixin doonaa, oo waxaan idin siin doonaa qalbi jiidh ah. 27 Oo Ruuxayga ayaan idin dhex gelin doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa inaad qayo nuunnadayda ku socotaan, xukummadaydana waad xajin doontaan, waadna samayn doontaan" (Yexesqeel 36:25-27). Tani waa farinta Axdiga cuseb oo aan I laah kaga helnay Ciise wilkiisa, Ciise Masiix.

Sawirkan waxaan haddana ku aragnay inay Malaa'ig muuqatay. Malaa'igaha waxaa loo soo dira kuwa llaah addeecsan si ay uga dhawraan waxyaalaha nooloshooda khatarta gelinaya sida aan uga akhrinayno aayadahan, (Sabuurrada 34:7; 91 :11; Danyeel 6:22; Matayos 2:13; 13:.39; 18:1O; Faalimaha Rasuullada 5:19; 12:7-1O).

Waxaa kale oo aan haddana sawirkan ku arkaynaa inuu sheydaanka mar kale soo muuqanaya, isagoo agtaagan wadnaha si isagoo sugaya inay imaan doonto fursad uu ku gala hoygiisi hare. Sababtaan daraaddeed ayaa nagula waaniyey sida erayga ku qoran oo leh, "Feeyignaada oo soo jeeda, waayo, cadowgiinna lbliiska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo u doondoonaa cid UU liqo" (1 Butros 5:8). Inta badan wuxuu iisu ekeysiyaa malaa'igta nuurka, oo wuxuu isku deyaa inuu jarrabaad geliya carruurta llaah ee aan ka fiirsashada lahayn inuu damaca adduunkan qalbigooda ka buuxiyo, wuxuu isku deyaya inuu xataa khiyaanayo kuwa uu llaah doortay. Haddii ay noqoto inaan sheydaanka addeecin isagu wuu naga carari doonaa (Yacquub 4:7).

## 6. SAWIRKA LIXAAD.

Tan waa sawirka ugu murugta badan ee qofka rumaysadka Masiixa ka soo noqday. Hal ii wax yar ayaa u dhiman intaanay xirmin, taa oo ay ka macna tahay inuu si tartiib ah uga qalbi jebaya nooloshiisa Masiixinimo, oo isha kalena xishood la'aan ayay gaararka u eegaysaa, iyadoo jacayl tusaysaa adduunka. Iftiinka isha ku jira wuxuu noqday mid aan awood lahayn, sawirada isaga ku jiraanna waxay tusayaan siduu diyaar ugu yahay inuu la silco Masiixa, laakiin way wada dheceen oo mar dambe wax awood ah oo ay leeyihiin ma leh. Waxaa ku hareersan jarrabaadyo kuwa uu si tartiib ah ogolaanaya bedelkii uu iska celin lahaa ama uu diidi lahaa. Bedelkii uu dhagaysan lahaa talada llaah wuxuu dhagaysanaya khiyaanayada iyo balamada beenta ah ee sheydaanka. Inkastoo uu haddaba sii ahaan karo mid Kiniisadda aada oo kharinaya damacyada uu waxyaalaha adduunka u qabo wuxuuna saa ku samaynaya isagoo hab diini ah ku noolanaya, jacaylka iyo addeecidda uu llaah u qabo sidii hore uma



Copyright. ANGP

kululo. Wuxu noqday mid aanan wax go'aan ah lahayn oo laba jid dhexddooda taagan oo aan ogayn kan uu qaadi lahaa. Waxyaalaha adduunka ayuu ku dhaqanaya laakiin dadka hortooda wuxuu iska dhigaya mid 1laah jacayl oo addeecaya. Xiddigga wadnahiisa ku jira, damiirkiisa waaya oo nuurkii wuu ka baaba'aya. Iskutallaabta farxad laguma xambaarsana, laakiin waxay noqotay culaab dhibaata ah. Iimaankiisa wuxuu noqday mid qarqaraya, wuu istaajiyey inuu Ilaah duco kula hadlo, wuu iska ilawbay oo wuxuu noqday mid aan wax daxdir ah qalbigiisa siinaynin oo si tartiib ah ayuu sheyadaanka hoy uga siinaya qalbigiisa waayo, wuxuu ku sugaya wadnahiisa agtiisa. Isagu wuxuu jacaylyahay inuu la socdo kuwa dembiilayaasha ah oo ma jeclo inuu la socdo kuwa xaqnimada I laah ku socdo oo goosteen inay Ilaah taos u addeecaan oo ay carruurta Ilaah noqday.

Daauuskii aan aragnay inuu kibirka metelaya, waxaan arkaynaa isagoo doonaya inuu fursad kale helo. Waxaa laga yaabaa inuu ilawbay inuu ku badbaaday nimco oo keliya, wuxuuna noqday Masiixi kibraya. Damaca khamri cabista ayaa iridda garaacaysa oo waxay doonaysaa inay meel heshho mar kale. Waxaa laga yaaba inay ahaato maalin caadil ah oo uu la socdo kuwa sharfalayaal ah, waxayna noqon doontaa mar uu ka baqanaya inuu noqdo mid ka duwan kuwa kale sidaa daraaddeed sheydaanka wuxuu ugu dhega hadlaya, waa hal mar keliya oo waxba kaa tar mayso ama Ilaah kaama hor qaadayso. Waxyaalaha aan ruuxiyanka ahayn iyo damacyada jidhka ayaa isa soo saaraya. Waxaa laga yaabaa inuu bilaabo inuu ku dhaqdo ciyaaro xun xun, oo uu mar kale dib u eego sawiro wasakh ah, oo wuu sii jeclaysanaya la jirka sharfalayaasha, wuxuu u raacaya meelaha ciyaaraha dansiga lagu ciyaaro, meelaha waxyaalaha aan I laah amaanaynin lagu samayo, isagoo uu sheydaanka ka dhaadhicinaya, waa baniaadminimo oo dembi hal mar la samayey waxba kaama tarayso.

Copyright: ANGP




Runtii way adagtahay inaan shimbiraha ka reebno inay madaxeena ku kor duulaan laakiin waxaan noqonaynaa dembiilayaal haddii aan u ogolaano inay madaxeena ku soo degaan oo ay buulalkooda madaxeena ku dhistaan isla sidaasna dembi ma ahan inaan la kulanno waxyaala shar ah laakiin waxaan dembiilayaal noqonaynaa uun markaan u ogolaano inaan sharkaas qalbigeena ku soo dhoweyno oo aan ku dhaqano. Haddii aad sheydaanka u ogolaatid inaad in yar oo fartaada ah waxaan kuu xaqiijinaya inuu gacanta ku qabsado oo kuu jiido naarta weligeed ah. Haddaba Ilaah wuxuu nagula talinaya inaanan u hunguri weynaanin damaca aduunka oo aan dembiga ciyaar la gelin hab kastoo ay noqotaba. Ku carar Ciise kan ah difaacahaada jira.

Ninka sawirkan ku jira oo aan arkayno inuu wadnaha mindi ku duraya, waxayna macna u tahay kuwa Masiixnimada- ka soo horjeeda oo ku jeesjeesaya - waana dagaal uu qalbiga fikiradaha kala duwan u kala qaybsan uu iska xajin karin. Bedelkii uu Ilaah ka cabsan lahaa ayuu baniaadmiga maxaa yeelay, baniaadmiga wuxuu ku hadlaya uuna ku dhaqmaya wax cabsi gala, sidaas daraaddeed qofkan wuxuu u addoonsamaya baniaadmiga bedelkii uu u addoonsami lahaa Ilaah. Xanaaq iyo iscelin la'aan ayaa isa soo cadaynayaan markuu dhib jiro ama ay wax niyad jab ah jiraan oo waxay isku qasbayaan qalbiga baniaadmiga. Sheydaanka maska iska dhigay oo aan aragnay in lagu calaamadayay hinaaska, isaguna meelba ma jiro oo markuu arko inay dadka kale hor mar qabaan wuu ka hinaasaya maxaa yeelay, isaga oo keliya ayaa wax isla raba. Sharka hinaaska isla markiiba wuu soo gelaya isaga oo aan ku ogaysinin, oo haddii in yar oo nafas ah la siiyo wuxuu soo kordhinaya nacayb iyo isla weyni.

Way sahlantahay inuu damaca lacagta qalbigeena soo gala haddii aanan iska xajinin oo aan ku dhaqmin wuxuu Ciise yidhi markuu yidhi, "Soo jeeda oo tukada inaydnaan jirrabaadda gelin. Ruuxu waa diyaar, laakiin jidhku waa itaal daran yahay" (Matayos 26:41). "Sidaa daraaddeed kii u malaynaya inuu taagan yahay, ha iska eego inuusan dhicin" (1 Korintos 10:12 ). "11 Oo hubka Ilaah oo dhan qaata, si aad u awooddaan inaad sirta Ibliiska hor istaagtaan. 12 Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwo amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira. 13 Haddaba sidaas daraaddeed hubka Ilaah qaata si aad u awooddaan inaad maalinta sharka iyaga is-hor taagtaan. Oo markaad saas oo dhan yeeshaan aad awooddaan inaad istaagtaan. 14 Haddaba istaaga idinkoo runta dhexda ku xidhan, oo laabtana laabdhawrka xaqnimada ku xidhan, 15 Oo cagahana gashan isu diyaarinta injiilka nabadda, 16 oo weliba waxaa kaloo aad qaadataan gaashanka rumaysadka, kaas oo aad ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan kan sharka leh fallaadhihiisa ololaya oo dhan. 17 Oo waxaad

qaadataan koofiyadda badbaadada iyo seefta Ruuxa oo ah erayga llaah. 18 Mar kasta llaah wax kaga barya Ruuxa iyo duco kastaba, oo taas ku dhawra adkaysasho oo dhan iyo uD ducaynta qoduusiinta oo dhan." ·(Efesos 6:11-18).

## 7. SAWIRKA TODDOBAAD



Sawirkan waxaa ka arkaynaa xaaladda qalbiga qofka Masiixnimada ka soo noqday, kaa oo ah mid mar daacad ahaa oo wanaagga iyo hadiyadda llaah dhedhemiyey oona la siiyey qaybtiisa Ruuxa qoduuska ah, iimaanka ka tegay oo sheydaanka ku noqday (Cibraaniyada 6:4). Waxay haddana na tusinaysaa qof aanan weligiis llaah uga toobadkeenin dembiyadiisa in kastoo uu ahaa mid maqlay runta lnjiilka oo la yidhaahdo "warka wanaagsan", waa la siiyey waana loo muujiyey isaga. Waa nin kiraahaysan oo aan doonaynin inuu I laah wax ka maqlo, ninkan wuxuu ku sii koraya noolosha dembiga ah maalin walibaba in kastoo uu isku deyaya inuu is bedelo.

Ciise naftiisa ayaa macnayay xaaladda dadka rumaysadka ku caasiyey markuu yidhi, "24 jinniga wasakhda leh goortuu ninka ka baxo, wuxuu maraa meelo aan biyo lahayn. lsagoo nasasho doonaya, oo markuu heli waayo, wuxuu yidhaahdaa, Waxaan ku noqonayaa gurigaygii aan ka baxay. 25 Oo goortuu yimaado wuxuu helaa isagoo xaaqan oo 26 Markaasuu tagaa oo wuxuu wataa toddoba jinni oo kale oo ka xunxun isaga, wayna galaan oo halkaas joogaan. Ninkaas wakhtigiisa dambe ayaa ka darnaada wakhtiga hore." (Luukos 11 :24-26).

"Wixii maahmaahda runta ah lagu yidhi ayaa iyaga ku dhacay. Eeygu wuxuu ku noqdaa mantaggiisa. Doofaaraddii maydhatayna waxay dib ugu noqotaa gelgelinta dhoobada." (2 Butros 2:22).

Baybalka si cadaan ah ayuu ku macnayay qafalada qalbiga ruuxa Msiixnimada ku caawiyey ama kan aan toobakeenka lahayn. Dembigu wuxuu haddana kula soo noqday khiyaanadiisa oo dhan oo hadda isagaa hogaanka haya qalbigan. Xataa wejigiisa ayaa laga garan karaa haddii qumaati loo eego, xaaladda uu qalbigiisa ku suganyahay. Ruuxa qoduuska ah, jacaylkaas degan, waa lagu qasbaya inuu qalbiga ka baxo, maxaa yeelay, dembi iyo Ruuxa qoduuska ah isku meel ma wada joogi karaan .. Way adagtahay inuu qalbiga noqdo hoyga llaah isla markaasna meesha uu sheydaanka isku qarinaya. Malaa'igta, erayga llaah waxay ku noolyihiin murugo, oo weli dib ayay u eegayaan qofkaas ama qoftaas si ey mar dambe u toobadkeento sida wiilkii lumay oo kale sida qoran, "16 Wuxuu damcay inuu calooshiisa ka buuxiyo buunshihii doofaarradu ay cunayeen, ninnana waxba ma uu siin. 17 Goortuu

isgartay ayuu yidhi, Intee baa kuwa aabbahay kiray-stay haysata kibis ka badan in ku filan, aniguna macaluul baan halkan ugu bakhtiyayaa. 18 Waan kici oo aan aabbahay u tegi, oo waxaah ku odhan, Aabbow, waxaan ku dembaabay jannada iyo hortaadaba. 19 Kol dambe ma istaahilo in laygu yeedho wiilkaaga, ee iga dhig sida kuwa aad kiraysatay midkood oo kale. 20 Markaasuu kacay, oo wuxuu u yimid aabbihii, laakiin intuu weli ka fogaa ayaa aabbihiis arkay, waana u naxariistay, oo ku soo orday oo qoortuu iskaga duubay, oo dhunkaday." (Luukos 15: 16-20). Aabbaha markuu arkay wiilkiisa oo murugaysan, wuu u cafiyey oo si faraxsan ayuu ku soo dhoweyey." Qalbiga sawirkaan ku jira waa mid ay toobadkeen dhab ah ay ku jirin, Ilaah uma soo noqonin, oo badbaado kama doonin cagaha Ilaah. Waxay u egtahay in damiirkiisa uu noqday sida mid lagu gubay bir ololaysa oo la aamusiyay. Dheguu leeyahay laakiin ma maqlaya codka Ciise Masiix oo isaga u yeedhaya. Indhuu leeyahay laakiin ma arkaya godka aan salka lahayn ee naarta ololaysa oo cagahiisa laga hoos furay. Wax xishood ah kama dareemaya dembiyadiisa. sheydaanka wuxuu u yimid inuu qalbigiisa xukumo oo wuxuu u dhex fadhiya sida boqor carshigiisa ku fadhiya. Waxaa laga yaabaa inuu weli ku faanaya inuu dadka hortooda ku yahay mid sharaf leh, maxaa yeelay, kor ahaan wuxuu u egyahay mid diinta ku dhaqmaya sida qabri kor laga qurxiyey "Waa idiin hoog, culimo iyo Farrisiin yahay, labaD wejiilayaasha ahu, waayo, waxaad u eg tihiin xabaalo la caddeeyey, kuwa dushoodu u eg tahay wax qurxoon, laakiin hoosta waxaa ka buuxa lafo dad dhintay iyo wasakh oo dhan" (Matayos 23:27).

Aabbaha beenta ayaa haysta meeshii uu Ruuxa Qoduuska ah ee runta uu ku fadhiisan lahaa. Xayawaan kasta, dembi kasta wuxuu la xiriirsanyahay nooc sheydaan ah iyo ruuxyada wasakhda ah ayaa la wareegay qalbigaan. Inkastoo uu doonaya inuu iska xorayo ruuyadaan sharka oo isaga cadaadinayaan, way xirxireen isaga oo kama fakan karo. "28 Ninkii diida sharciga Muuse kolkii laba ama saddex nin ku markhaati furaan ayuu naxariis la'aan dhintaa. 29 Taqsiir intee le'eg oo ka sii xun baad u malaynaysaan inuu istaahili doono kii Wiilka Ilaah ku joogjoogsaday, oo dhiigga axdiga oo isaga qoduuska lagaga dhigay ku tiriyey wax aan qoduus ahayn, oo caayay Ruuxa nimcada?" (Cibraaniyada 10:28,29) "2:1 Laakiinse waxaa dadkii ka dhex kacay nebiyo been ah, oo idinkana sidaas oo kale waxaa indinku dhex jiri doona macallimmo been ah, oo qarsoodi idinku keeni doona bidcinimo wax halligaysa, iyagoo inkiraya xataa Sayidkii soo iibsaday, oo dushooda ku soo dejinaya halligaad dhaqso ah. 2 Kuwa badan baa raaci doona falimahooda nijaasta ah, oo sababtooda ayaa loo caayi doonaa jidka runta ah. 3 Damac xumaan bay hadallo iskayeelyeel ah idinkaga baayacmushtari doonaan, kuwaas oo xukunkoodii waa hare lagu xukumay uusan haatgan raagayn, halligaaddoodiina ayan gam'ayn. 4 Maxaa yeelay, Ilaah uma tudhin malaa'igihii dembaabay, laakiinse wuxuu iyagii ku tuuray cadaabta, oo wuxuu ku riday godad gudcur ah iyagoo xukun aawadiis loo haayo. 5 Oo dunidii horena uma u tudhin, laakiinse wuxuu badbaadshay Nuux, oo ahaa mid xaqnimada wax ku wacdiya, iyo toddoba qof oo kale markuu daadkii ku soo daayay dunidii cibaadalaawayaasha. 6 Oo magaalooyinkii ahaa Sodom iyo Gomorana wuxuu ka dhigay dambas, oo intuu afgembi ku xukumay, ayuu masaal uga dhigay kuwii cibaada-laawayaal noqon lahaa, 7 Oo wuxuu ka samata bixiyey Luut kii xaqa ahaa oo aad loogu saxariiriyey sharcilaawayaashii dabii-caddoodii nijaasta ahayd. 8 Waayo, ninkaas xaqa ahaa iyaguu dhex degganaa, oo waxaa naftiisii xaqa ahayd maalin ka maalin silciyey camaladoodii sharciga ka geesta ahaa markuu arkay oo maqlay. 9 Rabbigu waa yaqaan sida kuwa cibaadada leh jirrabaadda looga samata bixiyo iyo sida kuwa aan xaqa ahayn loo hayo iyagoo ciqaaban ilaa maalinta xisaabta, 1 o khusuusan kuwa jidhka raaca, iyagoo damaca nijaasta ah ku socda, oo sayidnimada quudhsada. Iyagu waa indha adag yihiin oo waa macangag, kamana cabsadaan inay kuwa derejada leh caayaan. 11 Malaa'iguhuna in kastoo ay iyaga itaal iyo xoogba ka badan yihiin, iyaga dacwo cay ah Rabbiga hortiisa kagama dacweeyaan. 12 Laakiinse kuwanu waa sida xayawaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la qabsado oo la dilo, oo waxay caayaan wax aanay garanayn. Hubaal iyagu haligaaddooda ayay ku halligmi doonaan. 13 Xaqdarradooda waxaa loogu abaalgudaa xaqdarro, oo waxaa iyaga la wanaagsan inay maa linnimada raaxaystaan. Iyagu waa waskhaamiin iyo ceebaalowyo, oo markay idinla feeysteeyaan waxay ku raaxaystaan khiyaana-dooda. 14 Waxay leeyihiin indho sino miidhan ah oo aan dembi ka joogsan karin. Kuwa aan adkayn ayay sasabtaan, waxayna leeyihiin qalbi damacxumaan ku noqnoqda, oo waa dad nacladeed." (2 Butros 2: 1-14).

Haddaba saaxib, haddii aad sawirkan la barbadhigtay hab noolaydkaaga, haddaba llaah u barooro adigoon daahin oo ah ahaato daacanimo qalbigaada ka soo baxday "Sidaas daraaddeed dhammaan buu u badbaa-din karaa kuwa llaah ugu dhowaada isaga, maxaa yeelay, isagu weligiis waa nool yahay si uu ugu duceeyo iyaga." (Cibraaniyada 7:25). Wuxuuna diyaar u yahay awoodaana inuu dembiyadaada oo dhan kaa kuu dhaafo, haddii aad ku imaatid toobadkeen dhab ah. Wuu kaa fogayn karaa sheydaanka iyo sharkiisa oo dhan, wuuna ka saari karaa qalbigaada laakiin waa uun haddii aan u ogolaatid inuu qalbigaada ka shaqeeyo. U kaalay ciise isla sida ninkii baraslaha ahaa Ciise ugu yimid uuna yidhi, "Markaasaa waxaa u yimid nin baras leh, wuuna jilba joogsaday oo baryay, oo ku yidhi, Haddaad doonaysid waad i daahlrin kartaa. 41 Kolkaasaa Ciise u naxariistay, oo intuu gacantiisa soo taagay, ayuu taabtay oo ku yidhi, Waa doonayaa e daahirsanow." (Markos 1 :40,41). Laakiin haddii aad sii madax adkaysatid oo aad sii jeclaatid inaad mugdiga ku socotid wax rajo ah ma lihid, macaawino ma lihid, maxaa yeelay, waxaad xulatay dhimasho bedelkii aad xulan lahayd noolosha-dembiga mushaharaadkiisa waa dhimasho (Rooma 6:23).

## 8. SAWIRKA SADDEEDAAD.





Halkan waxaa ku arkaynaa sawirka ninka ka madax adkaystay inuu go'aan gaaro si uu Ciise u raaco, wuxuuna ku socdaa dhirnashada, jidhkiisa waxaa ka buuxa xanuun farabadan oo qalbigiisa waxaa ka buuxa cabslda dhimashada. Dhimashada (lafmadaxa) waxay timid mar aanan la filanaynin. Stareexi beenta ahaa uu dembiga keenay wuu idlaaday, oo hadda waa in lala kulma dhabta natiijada dembiga. Shalaynta naarta ayaa hadda u soo caddaanaysa isaga. In kastoo uu hadda jacaylyahay inuu ducaysto, wuxuu arkaya inuusan awoodin inuu llaah xiriir la yeesho maxaa yeelay, muddo dheer ayuu ka soo horjeeday jacaylkiisa. Saaxibadiisa waxay ka baqanayaan inay sariirtiisa ag istagaan, oo hadaladooda dhiirigalka ahna wax ay hadda u tarayaan ma leh. Taajirnimadiisa nooloshiisa ma kordhin karto, ruuxiisana ma badbaadin karto ama xataa ma yarayn karto shalaynta qalbigiisa ku jirta. Wuxuu arkaya inay ku adagtahay inuu llaah xiriir la yeesho ama uu la hadlo waayo, sheydaanka ayaan u ogolayn inuu fursad noocas ah helo.

Wax alaate wuxuu isku halayn jiray oo dhan hadda way ka hor imadeen oo isagay ku jesjeesayaan xataa kuwa aan rajo lahayn ayuu rajo ka doonaya sida wadaaddada aan naftinkoodaba llaah addeecin

wax ay hadda u t ari karaanna ma jiraan, maxaa yeelay, wuu diiday jacaylka llaah oo hadda xukunka llaah ayuu hor joogaa, wuxuu hadda ogaanaya sida uu Kitaabka sheegaya, "waa wax aad cabsi u leh in lagu dhaco gacmaha llaaha nool." (Cibraaniyada 10:31). Waa ayaa jiray uu rajayay inuu llaah raja saarto, laakiin hadda waa mar ay mindida uuska ku tagtay. Waxaa jiraan kumaan kun oo ruux oo maalin waliba si lama filaan ah ku dhinta, iyagoon lahayn fursad ay I laah ugu soo noqdaan iyagoo sakaraad ah oo sariirta ku jiifa. Sidaa daraaddeed waa muhim in llaah loo noqdo intay gooray goor tahay. Bedelkii uu maqli lahaa erayada dhiirigalka iyo badbaadinta llaah, ninkan dhimanaya oo diiday inuu badbaada iyo jacaylka llaah qaato intuu noolaa wuxuu hadda maqlaya erayada xakiinkiisa, badbaadiyaha uu ku caasiyey, isagoo leh, "Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan doonaa, Kuwa yahow inkaaranu, iga taga oo gala dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey." (Matayos 25:41). "Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo" (Cibraaniyada 9:27).

## 9. SAWIRKA SAGALAAD




Sawirkan wuxuu na tusinaya qof Masiixi ah oo ilaa dhamaadka wakhtiga aamin oo u dulqaatay xanuun iyo jarrabaad kasta oo u qalma inuu qaato taajka weligiis ah. Markii laga jarraabo dhinac kastaba wuxuu yahay aamin oo ilaa dhamaadka wakhtiga ma bedelayo go'aankiisa, ilaa uu kaga guulaysto Ciise Masiix. Ma uusan gelin oo keliya orotaanka Masixiinta, laakiin wuu ku dhaqmay Masiixnimada waayo, wuxuu ku orday ujeeddo sida uu erayga llaah leeyahay, "Sidaas daraaddeed, innagoo haysanna markhaatiyaal badan 12 oo sida daruur u weyn oo inagu wareegsan, aynu iska dhigno culays kasta iyo dembiga dhibyaraanta inoogu dhegaya, oo aynu adkaysasho ku orodno tartanka ina hor yaal, 2 innagoo fiirinayna Ciise oo ah Bilaabaha iyo Dhammeeyaha rumaysadkeenna, kii farxaddii hor tiil daraaddeed u adkaystay iskutallaabta, isagoo fududaysanaya ceebta, oo fadhiistay midigta carshiga llaah" (Cibraaniyada 12: 1-2).

Sheydaanka iyo sharkiisa oo dhan ayaa hareerahiisa joogaan si ay u helaan fursad ay cunugga I laah dariiqa xaqa ah uga leexiyaan. Islaweynida, lacag jacalka, anshax la'aanta, iyo waxyaala kale ayaa qalbigiisa ku hareersan oo fursad wada sugayaan. Meshii shabeelka waxaa hadda ku jira dameer,

maxaa yeelay, dembigu mar kastaba wuxuu noogu yimadaa wejiyo kala duwan. Laakiin qofka ka fiirsashada leh oo Ilaah addeecaya wuu kala yaqaana waxyaalaha dembiga ah magac kastoo la siiyaba ama hab kastoo ay u yimadaanba maxaa yeelay, Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah iyo eraygiisa ayaa ku hogaaminaya waddada xaqa ah. Waxaan arkaynaa nin dhala biir ah haysto oo ku hor heesaya qofka Masiixiga ah si uu u damacsiyo uu ugu soo jiido waxyaalaha adduunka, laakiin waxyaalahaas oo dhan dhib kuma ahan qofka Masiixiga ah oo daacadda ah, maxaa yeelay, 'isaqu Ciisuu la dhintay haddii aan eegno xagga sharka iyo waxyaalaha adduunka. Ninka labaad waxaan arkaynaa isagoo toori ku mudaya qofka Masiixiga ah. Waxaa kaloo jiraan cay, xamasho, ku jeesjeesid iyo caga juglayn uu qofka Masiixiga ah kala kulmaya kuwa aan rumaystayaasha ahayn amaba kuwa Masixiinta ah oo qalbiga qofka Masiixiga ah ayay wareemayaan. Laakiin ma dhagaysanaya waxa ay dadka leeyihiin wuxuuse dhagaysanaya waxa uu Ilaah leeyahay. Wuxuu xusuusanaya erayadii Ciise Masiix markuu yidhi, "Waad barakadaysan tihiin goortii laydin caayo, oo laydin silciyo, oo wax walba oo xun oo been ah laydinka sheego aawaday. 12 Farxa oo reyreeyaa, waayo, jannada abaalgudkiinnu waa ku weyn yahay, waayo, sidaasay u silcin jireen nebiyadii idinka horreeyey" (Matayos 5: 11 , 12).

Dabiicadeena dembiga leh iyo sheydaanka waxay mar kastaba isku deyayaan inay Masixiinta jacaylka Ilaah ka fogayaan. Laakiin qofka Masiixiga ah wuxuu si farxad leh ku odhan karaa, "Yaa jacyalka Masiixa inaga sooci doona? Ma dhibaato, mise cidhiidhi, mise silic, mise baahi, mise arrad, mise khatar, mise seef?" (Rooma 8:35). "Maya waxyaalahan oo dhan dhexdooda aad baynu ugu guulay-sannaa kii ina jeclaa xaggiisa." (Rooma 8:37). Madaama uu wada g ishtay hubka I laah oo dhan, wuu awoodaa inuu iska celiyo weerark kastoo jarrabaad ama imtixaan ahba, isagaan ku guulaysanaa oo waxaan noqonaa kuwa istaahilo inay helaan taajka weligiis jira oo aan duloobi doonin. (Efesos 6: 10-18, 1 Butros 5:4).

XIDDIGGA damiirkiisa waa qumanyahay waana nuuraya. Qalbigiigsana waxaa ka buuxa iimaan iyo Ruuxa Qoduuska ah. Malaa'igta, isla sida erayga Ilaah waxay xusuusinaysaa barada sugaysa kuwa Ilaah daraaddiis u adkaysan doona oo taajka weligiis ah heli doonaan maalinta ugu dambaysa, Erayga Ilaah wuxuu leeyahay, "Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta ayaa waxaan siin doonaa amar uu wax kaga cuno geedka nolosha oo ku dhex yaal *Firdooska Ilaah... Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta dhimashada labaad waxba yeeli mayso... Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta waxaan wax ka siin doonaa *maannada qarsoon, oo waxaan siin doonaa dhagax cad. Dhagaxa dushiisana waxaa ku qoran magac cusub oo aan ninna aqoon, kan hela mooyaane. Warqaddii kiniisadda Tu'ateyra loo di ray... Kii guulaysta oo shuqulladayda sii xajiya tan iyo ugu dambaysta, waxaan siin doonaa amar uu ku xukumo quruumaha ... Kii guulaystaa sidaasuu u xidhan doonaa dhar cad; oo anna sinaba magiciisa ugama tirtiri doono kitaabka nolosha, o waxaan magiciisa ka qiran doonaa Aabbahay hortiisa iyo rnalaa'iqthusa hortooda ... Kii guulaysta waxaan ka dhigi doonaa tiir ku jira macbudka Ilaahayga, halkaasna mar dambe kama bixi doono, oo waxaan dushiisa ku qori doonaa magaca Ilaahayga, iyo magaca magaalada Ilaahayga, taas oo ah Yerusaalemta cusub, oo samada iyo xagga Ilaahayga ka soo degaysa, iyo xataa magacayga cusub ... Kii guulaysta, waxaan siin doonaa amar uu carshigayga igula fadhiisto, sida aan a.niguba u guulaystay, oo aan Aabbahay ugula fadhiistay carshigiisa." (Muujintii 2:7,11,17,26; 3:5,12,21).

BOORSADDA LACAGTA EE FURAN waxay tusaysaa in qalbigiisa oo keliya uusan Ilaah ku xirnayn laakiin xataa lacagtiisa. Bedelkii uu lacagtiisa macna darro ku istecmaali lahaa wuxuu siinaya masakiinta meel tobanaadkana ama zakadana wuu bixiyaa ama xataa saddaqada amba wax alaate wuxuu leeyahay oo dhan wuxuu u istecmaalaya doonista Ilaah.

MOOFADA IYO KALUUNKA waxay tusayaan inuu ku noolyahay noolol nadiif ah oo weliba escelin leh. Nooloshiisa kurna qaribo cabbitaanka lagu sakhraamo iyo cuntooyinka nijaasta ah (Faalimaha Rasuullada 15:20). Lacagtiisana ma lumiyo, jidhkiisana si xun uma istecmaalo maxaa yeelay, waa macbudka Ilaah, ma qaato waxyaalaha jidhka qariba sida calaalinta jaadka, sigaar dhuuqista amaba tubaaka cunista, oo weliba ma istecmaalo dawooyinka culus sida bangiga iyo dawooyinka kale ee la



Copyright: ANGP

midka ah laakiin wuxuu cunaya cuntada jidhkiisa wax u taraysa. Qalbigiisa wuxuu noqday hoyga baryada ama ducada. Wuxuu haddana kiniisadda u aadaya si joogta ah oo sharaf leh, hawa kastoo jirta iyo marxalad kastoo jirtaba. Wuxuu jacayl yahay ducaysadka, haddii ay noqoto Kiniisadda dhexdeeda ama gurigiisaba uu reerkiisa la ducaysanaya, amaba qolkiisa markuu ku jiro keligii, maxaa yeelay, wuxuu ogyahay inuusan qofka Masiixiga ay barbaaraynin hadduusan Ilaah ducada xiriir kula lahayn.

BUUGGA FURAN waxay macnaynaysaa inuu Baybalka isaga u yahay buug u furan, wuuna akhristaa maalin kasta, oo wuxuu ka helaa xigmad iyo garasho, noolol iyo nuur, oo waxaa erayga Ilaah ku jiraan barakooyin waweyn. Wuxuu isaga u noqday iftiinka hogaaminaya iyo weliba wax.a uu kaga awood badiyo sheydaanka iyo sharkiisa oo dhan. Waa cuntada uu qalbigiisa maalin waliba ku quudiyo, waa biyaha uu oonkiisa ku baabi'iyo, waa qubayska uu isku nadiifiyo, waana muraayadda uu isku eego.

Wuxuu jacaylyahay inuu iskutallaabtiisa qaato, maxaa yeelay, wuxuu ogyahay inaanay jirin hadiyad la helaya iskutallaabta la'aanteed. Maxaa yeelay, wuxuu ogyahay inuu la soo sara kacay Masiixa si uu ugu noolaado noolol cuseb, wuxuu qalbigiisa saartay waxyaalaha jannada ku jira, wuxuu maankiisa ku haya waxyaalaha halkaas, ma ahan waxyaalaha adduunkan (Kolosay 3:1-2). Isagu diyaar buu u yahay inuu Ilaah la kulmo, wuxuuna yahay sida geed lagu beeray biyaha qarkooda; kaa oo midha dhalaya wakhtigiisa sida ku dhigan Sabuurrada 1 :3; sida laanta canabka dhabta ah, oo midho badan dhala. Ma yaqaano dhimasho ka cabsasho, maxaa yeelay, jacaylka Ilaah oo laysku halayn oo uu ku helay Ruuxa qoduuska ah, oo qalbigiisa ka buuxsamay.

## 10. SAWIRKA TOBNAAD

Ciise wuxuu yidhi, "Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa. 26 Kii kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma dhiman doono. Wax.an ma rumaysan tahay?" (Yooxanaa 11 :25,26). "Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii hadalkayga maqla oo rumaysta kii i soo diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay" (Yooxanaa 5:24) Dhimashada wax ay qofka Masiixiga ah u hayso ma leh xataa haddii ay ahaato cabsi ama cadaab. Erayga Ilaah wuxuu leyahay, "Markii kan qudhmayaa uu gashado qudhunla'aanta, oo kan dhimanayaana uu gashado dhimashola'aanta, markaas hadalka qorani wuu noqon doonaa ee ah, Dhimashadii waxaa liqday libtii. 55 Dhimashoy, meeday libtaadii? Dhimashoy, meeday mici-daadii? 56 Micida dhimashadu waa dembiga, oo xoogga dembiguna waa sharciga. 57 Laakiin Ilaah baa mahad leh kan libta inagu siiya Rabbigeenna Ciise Masiix" (1 Korintos 15:54-57).

Qofka Ilaah u nool oo daacadda u ah, wax cabsi ah kama qabo dhimashada. Markii la gaaro wakhtiga dhimashadiisa, isagoo faraxsan ayuu hooyanaya, sida uu Rasuul Bawlosba yidhi, "Laakiinse anigu labada dhexdoodaan ku dhibtoonayaa, oo waxaan jeclahay inaan tago oo Masiixa la joogo, waayo, tassu aad bay iigu roon tahav" (Filiboy 1 :23).

Masiixiga wuxuu mar kasta damacsanyahay inuu wejiga Ciise arko, kan isaga u dhintay oo qaymaha dembigiisa ugu guday iskutallaabta. Ruxa qoduuskana wuxuu xusuusinaya erayadii Ciise Masiix markuu yidhi, "Qalbigiinnu yuusan murugoon. Ilaah waad rumaysan tihiin, anigana i rumaysta. 2 Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan idiin sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tegayaa inaan meel idiin sii diyaariyo. 3 Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin qaadan doonaa, in meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan. 4 Oo meeshaan tegayo iyo jidkaba waad taqaannun" (Yooxanaa 14:1-4). "Laakiin sida qoran, Waxyaalo aanay ishu arkin, oo aanay dhegtu maqlin. Oo aan qalbiga dadka geiln, Wax kaastoo ay yihiinba, Ilaah baa u diyaariyey kuwa isaga jecel." (1 Korintos 2:9). Ma jirto luuqad adduunka looga

Copyright: ANGP




hadlo oo aan ku manayn karno quruxda iyo wanaagga ku jira magaalada qoduuska ah ee Ilaah oo loo diyaariyey kuwa Ciise Masiix adduunkan ku raacsan inay dhaxlaan.

Bedelkii calaamadda lafmadaxa (dhimashada), malaa'ig ama wargeeyaha Ilaah ayaan ku arkaynaa sawirkan. Wuxuu diyaar u yahay inuu qalbigan nadiifka ah xaggta Ilaah ku celiyo. Maskaxda iyo qalbiga waa laga xorayay jidhkan baaba'aya, oo waxay ka galayaan iridda kore ee jannada oo wuxuu u tegaya Ciise kan ah mid isaga jacayl oo ugu dhintay iskutallaabta. Soo dhoweyn farxad leh ayaa suganaysaa isaga oo I laah hortiisa lagu soo dhoweyn doono waxaana salaami doona Rabbigiisa iyo weliba Sayidkiisa oo wuxuu ku soo dhoweyn doonaa erayadaan, "Sayidkiisii ayaa ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay, addoon yahow wanaagsan oo aaminka ahu. Wax yar ayaad aamin ku ahayd, wax badan baan madax kaaga dhigayaa. Farxadda sayidkaaga gal" (Matayos 25:21). Sheydaanka wax shuqul ah uu mar dambe ku lahaan karo ma jiraan waayo, erayga Ilaah wuxuu leeyahay, "Waxaa dhacay inuu miskiinkii dhintay, oo malaa'igahu waxay u qaadeen laabtii Ibraahim. Ninkii hodanka ahaana waa dhintay, waana la aasay.". (Luukos 16:22).

"Oo haddana waxaan samada ka maqlay cod igu leh, Qor, Waxaa barakadaysan kuwa hadda ka dib dhimanaya iyagoo Rabbiga rumaysan. Ruuxii wuxuu leeyahay, Haah, iyagu waa inay ka nastaan hawshoodii, waayo, waxaa iyaga la socda shuqulladoodi." (Muujintii 14: 13).

Copyright - ANGP

WAANADA UGU DAMBAYSA

Walaale akhristow, waxaan kuu rajaynaya inuu Ilaah ku caawiyo si aad qalbigaada u siisid kan ku jacayl, maxaa yeelay hadduu kula hadlaya oo wuxuu leeyahay, "Oo markii waxyaalahan oo dhammu ay idinku dhacaan, kuwaas oo ah barakada iyo inkaarta aan idin hor dhigay, oo aad ku xusuusataan quruumaha Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idinku kexeeyey dhexdooda oo dhan, 2 oo aad Rabbiga Ilaahiinna ah u soo noqotaan oo aad idinka iyo carruurtiinnuba qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo 'dhan ku addeecdaan codkiisa iyo waxyaalahan aan maanta idinku amrayo oo dhan." (Sharciga Kunoqoshadiisa 30:1,2). Ciise Masiix sii daalkaaga, niyadjakaaga iyo xanuunka qalbigaada oo dhan, wuxuuna ku siin doonaa qalbi cuseb iyo niyad cuseb. Yaanay ku khiyaanin maskaxdaada beenleyda ah ama ha raacin damacyada jidhkaaga maxaa yeelay, erayga Ilaah wuxuu leeyaha, "Waayo, wax.an weeye wax.a qalbiga dadka gudihiisa ka soo baxa fikirrada shar leh, iyo wasmada xaaraanta ah, iyo

tuuganimada. iyo dilidda," (Markos 7:21). Dembiyadaada ka soo tag oo ku dhegenaw oo keliya waxyaalaha uu llaah raali ka yahay, waayo, erayga I laah wuxuu leeyahay, "Waayo, mu-shahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda llaah waa

nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix." (Rooma 6:23).

Adigana kan nooloshiisa Ilaah siiyeyow, Erayga Ilaah wuxuu kuugu leeyahay, "Masaalkii erayada runta ahaa ee aad iga maqasheen ku xaji rumaysadka iyo jacaylka Ciise Masiix ku jira." (2 Timoteyos 1:13). Isla sababtaas ayuu rasuul Bawlos u qoray 2 Timoteyos 1:12 wuxuuna yidhi, "Sababtaas aawadeed ayaan waxyaalahan ugu xanuunsanayaa; laakiinse ka xishoon maayo, waayo, waan garanayaa kan aan rumaystay, oo waxaan aaminsanahay inuu awoodo inuu dhawro wixii aan ku ammaanaystay ilaa maalintaas." Rumaysadka aad Ilaah ku leedahay ku kor, ku ducayso awoodda Ruuxa qoduuska ah, si joogta ah ugu jir jacaylka Ilaah, indhahaaga ku taag Ciise Masiix, jidka, runta iyo noolosha, Rabbigeena kan mar dhaw soo noqon doona oo carruurtiisa qaadi doona– "Boqorka boqorada iyo Rabbiga rabbiyada" (1 Timoteyos 6:15).

"Oo kan kara inuu turunturada idinka ilaaliyo oo uu ammaantiisa idin hor taago, idinkoo aan iin lahayn oo aad u faraxsan, 26 isagoo ah Ilaaha keligiis ah oo Badbaadiyeheenna ah, ammaan iyo weynaan iyo xoog iyo amar ha u ahaadeen xagga Rabbigeenna Ciise Masiix, wakhtiga oo dhan ka hor iyo haatan iyo weligeedba. Aamiin. (Yuudas 24,25).

Copyright ANGP

**A SPECIAL WORD FROM ANGP**

**UN MONDE SPÉCIAL DE L'ANGP**

**UMA PALAVRA ESPECIAL DA ANGP**

**This booklet "The Heart of Man" is available in over 538 languages and dialects spoken throughout the world (Africa, Asia, The Far East, South America, Europe, etc.) Our Heart Book is now also available on cell phones, tablets, etc from www.angp-hb.co.za**

**Le livre du "Coeur de l'homme" peut etre obtenu en plus de 538 langues et dialectes parles dans le monde entier, a savoir: Afrique, Amerique, Asie, Extreme Orient, Europe. Notre Livre du Coeur est maintenant aussi disponible sur votre Telephone cellular, plaques, etc. de www.angp-hb.co.za**

**Este livro "O Coracao do Homem" e obtfdo em mais de 538 linguas e dialectos falados em todo o mundo, a saber: (Africa, Asia, America do Sul, Extremo Oriente, Europa, etc). O nosso Livro O Coração do Homem tambem esta agora disponivel em telefone celular, tablets, etc. de www.angp-hb.co.za**

**The 10 heart pictures contained in this booklet are also available in the form of large coloured picture charts (86 x 61cm) bound together in a set of 10 pictures. These "Heart Charts" can be obtained with European or African features and are particularly suitable to be used in conjunction with the Heart Book for class-teaching, open air evangelization etc. Kindly contact us to ascertain the latest subsidized price of this chart.**

**Les 10 images du coeur qui figurent dans ce livre peuvent etre obtenues en tableaux de couleur, format 86 x 61 cm, avec des physionomies europeennes ou africaines. Ils peuvent etre utilises en meme temps que le livre du coeur pour des classes bibliques, a l'ecole du dimanche ou lors de reunions de plein air. Soyez aimable de nous contacter pour assurer les derniers prix en cours du tableau.**

**As 10 imagens do coracao, contidas neste livro podem ser obtidas num conjunto de 10 imagens em colorido no tamanho de (86 x 61 cm). Estes "Cartazes do Coracao podem ser obtfdos com caracterfsticas Europeias e Africanas e podem ser usados em conjuncao com o mesmo livro em classes de ensino biblico, evangelizacao ou ao ar livre. Agradeciamos que nos contacta- se para confirmacao do ultimo preco dos cartazes.**



**Kindly write to us if you are able to assist us with further translations of our free Gospel literature, informing us of the language into which you could translate this Gospel literature. Your assistance would be appreciated.**

Copyright: ANGP

**If you have found salvation in Christ, or have been otherwise blessed through our Gospel literature, please let us know. We would like to thank God with you, and remember you further in our prayers.**

**Nous vous invitons a nous contacter pour faire des arrangements concernant de nouvelles traductions de notre litterature, nous informant de la langue dans laquelle vous pouvez traduire cette litterature evangelique. Votre aide sera beaucoup appreciee.**

**Si vous avez trouve le salut en Christ ou si vous avez ete beni par notre litterature, nous vous prions de nous le faire savoir. Nous aimerions remercier Dieu avec vous et prier pour vous.**

**Nos vos convidamos a nos contactar, afim de fazer qualquer arranjo concernente a novas traducoes de nossa literatura em outras lfnguas. Vossa assistencia sera muito apreciavel.**

**Se tem encontrado a salvacao em Cristo, ou se tem sido abencoado por intermedio da nossa literatura evangelica, faca o favor de nos informar. Pois nos gostarfamos de agradecer a Deus juntamente convosco, e lembra-lo sempre em nossas oracoes.**

**For free Gospel literature, books and tracts in over 538 languages, write to:**

**Pour obtenir gratuitement de la litterature evangelique, des livres et des traites en plus de 538 langues, ecrivez a:**

**Para obter gratuftamente a literatura evangelica, livros e folhetos em mais de 538 lfnguas diferentes escreva para:**

**ALL NATIONS GOSPEL PUBLISHERS**
**P.O. Box 2191**
**PRETORIA**
**0001**
**R.S.A.**

**A Gospel Literature Mission financed by donations**
**Une Mission de litterature evangelique financee de dons**
**Missao de literatura Evanqelica financiada por donativos**

**(Reg. No. 1961/001798/08)**

Copyright: ANGP